
# Waxqabadyada Waxbarashada Guriga

WAXBARASHADU waxa ay ka suurtogashaa goobkasta, xilli kasta iyo qof walba.



EENET
Enabling Education Network

NAD – The Norwegian Association of Disabled

**EENET – Enabling Education Network**
PO Box 422
Hyde
Cheshire
SK14 9DT
UK

www.eenet.org.uk

info@eenet.org.uk

+44 (0)7929 326 564

Shaqadaan waxaa shatigeeda bixiyey Creative Commons Attribution —Noncommercial-Share Alike 4.0 waaxdeeda shatiyada caalamiga ah. Si aad u aragtid nuqulka shatigaan, booqo lingaxaan; http://creativecommons.org/licenses/by-nc-sa/4.0/

# Tusmo


**Hordhac** 4

**Waxqabadyada ku habboon carruurta naafada ah iyo kuwa leh baahiyaha waxbarasho ee gaarka ah.** 6

**Waxqabadyada Buugga** 8-73

Buugga alifbeetada 8
Dhisidda dhisme dheer 10
Xujo samayn 11
Xisaabin 13
Cunto karin miisaaman 16
Naqshadee shax ciyaareed 18
Ma aragtaa waxa aan arko? 20
Sawir xayawaan cajiib ah 21
Sawir magaaladaada male-awaalka ah 23
Waxyaabaha aad xiisayso 25
Doontaada sabbaysii 27
Ganacsi bilaabid 28
Immisa erey ...? 30
Haddii aan madaxweyne ahaan lahaa .... 31
La Sheekayso qof weyn 33
Hindis qalab/Agab (mashiin ama qalab fudud) 35
Dib u habeynta alaabaha loo adeegsaday 37
Diyaarinta Liiska 39
Sawir khariiradda deegaankaaga 40
Sigisaanta/Sharabaad ka samee boonbale 42
Gariir ama shax xisaabeed la mid ah. 44
Daawashada Deegaanka Dabiiciga ah 46
Hees Cusub, cod hore 49
Gabey Jacbur ah 50
Abuur iniin una fiirso sida ay u korayso 53
Wax wada Akhrin (Akhrin-wadareed) 55
Baadi-goob (raadin) 58
Lambar sireed 60
Muuqaalada iyo qaababka waxyaabaha dabiiciga ah ee deegaanka 62
Sheeko meerto ah 64
U Mahadceli halyeyga bulshada 66
Xasayn/Qarin 67
Labaatan Su'aalood 69
Warqad aad Macallinkaaga u dirayso 71

# Hordhac

## Yaa loogu talogalay buuggaan?

- Waxqabadyadaan waxaa loogu talogalay **dhammaan qoysaska** leh carruurta baahiyaha gaarka ah leh iyo kuwa aan laheyn
- Waa waxqabadyo loogu talogalay **cid kasta** – Hooyooyinka ,aabbayaasha, xannaaneeyaasha, dhallinyarada, walaalaha (wiilal iyo gabdho ba) ayeeyooyinka ,awoowayaasha, eeddooyinka iyo adeerayaasha. Waxaa jira fursado badan oo wax la iskula baran karo.

## Maxay yihiin waxqabadyadaan?

Waa **waxqabadyo wada socda** oo loogu talo galay in ay guryaha ku sameeyaan dhammaan caruurta da' kasta leh, waalidka, xannaaneeyayaasha iyo guud ahaan qoysaska. Cidkasta ayaa adeegsan karta waxbqadyadaan si ay ugu dhisaan fikradahooda iyo hal-abuurradooda. Inta badan waxqabadyadaan waxaa la sameyn karaa xilliyo kala duwan iyadoo loo sameynayo habab kala geddisan.

## Maxaa loo sameeyey waxqabadyadaan?

Waxqabadyadaan waxay kaa caawinayaan habab kala duwan oo carruurtu guriga wax ugu baran karaan. Qeybo ka mid ah waad fahmi kartaa maadaama ay carruurtu horay u sameyn jireen. Waxqabadyadaan waxay qoysaska ka caawin doonaan inay si weyn ugu **baraarugaan in waxbarashadu ay ka dhici karto guryaha** ayna sidoo kale waxbarashadaasi fududaynayso in la hormariyo waxbarashadii dugsiga.

## Sidee loo adeegsanayaa waxqabadyadaan?

La soco waxyaabaha ay carruurtu sameynayaan. U oggolow inay doortaan waxqabadyada ay xiisaynayaan. Waxqabadyadu uma baahna in loo sameeyo si gaar ah oo cayiman.

Waxaa jira macluumaad lagugu siinayo waxqabad kasta, kuwaas oo ah sidaan soo socota:

**Waxa aad u baahantahay:** sanduuqaan wuxuu ku tusinayaan agabka aad u baahantahay inaad diyaarsato si aad waxqabadka u sameyso. Waxqabadyada qaar uma baahna wax agab ah, halka qaar ay u baahanyihiin qalin-rasaas, waraaq, baakado, waxyaabaha dib loo adeegsado iyo agabyo kale kuwaas oo aad gurigaaga ka heli kartid wax kharash ahna aan kaaga baahnayn.

**Waxyaabaha la qabanayo:** tilmaamahaan waxaa loo qoray si ay carruurtu u raacaan. Carruurta wax akhrin karta waxay u raaci karaan sida ay tilmaantu tahay, halka kuwa aan wax akhrin karin ay caawimaad uga baahanyihiin walaalahooda ka waaweyn ama waalidka wax akhrin kara.

**Waxqabadyo dheeri ah:** mararka qaar waxqabadyo dheeri ah ayaa lagu darayaa si qofka weyn ama carruurta awoodda ay ugu noqoto isku-day adag.

Qeybta hoose ee waxqabad kasta waxaa ku jira macluumaad kaa caawinaya inaad ilmaha u doortid waxqabadka ku habboon. Waxaa ka mid ah:

**Da'da:** waxay kuu sheegaysaa da'da ilmaha ee ku habboon shaqada, laakiin se inta badan da' kasta oo carruurta ah way sameyn karaan waxqabadyadaan. Natiijadooda way kala duwanaan kartaa, tusaale ahaan, ilmaha weyn waxbadan ayuu qori karaa ama si fiican ayuu wax u sawiri karaa.

**Caawimaadda waalidka/walaalka weyn:** tani waxay kuu sheegaysaa haddii adiga ama ilmaha weyn ee walaalka ama walaasha ah uu ilmuhu uga baahanyahay caawimaad weyn ama mid yar ama haddii ilmuhu uu isaga kaliya qabanayo. Xogtaan waxay kaa caawinaysaa inaad mararka qaar aad ilmaha ka agdhowaatid adigoo howlo kale sameysanaya marka uu ilmuhu waxqabanayo. Adiga ama walaalaha waaweyn waxaa looga baahanyahay inaad caawimaad sare u sameysaan ilmaha leh baahiyaha waxbarashada ee gaarka ah ama naafada ah.

**Waxa aad baran doonto (aqoonta) iyo waxa aad sameyn doonto (Xirfadda):** Waxqabad kasta wuxuu ilmaha ka caawin doonaa inay kobciyaan aqoontooda, ama sameeyaan oo bartaan xirfad cusub. Sanduuqa ku yaalla qeybta hoose ee waxqabad kasta wuxuu ku tusinayaan aqoonta iyo xirfadda laga helayo waxqabadka. Waxqabadyo badan waxay la xiriiraan in la sameeyo, la dhiso ama la abuuro waxyaabo caawinaya in ilmuhu sameeyo xirfado muhiim ah. Xirfadahaas waxaa ka mid ah xiriirka, wadashaqeynta, hal-abuurka, xallinta dhibaatooyinka, fikirka qotoda dheer iyo isku xirka muuqda. Macallimiinta iyo dugsiga ba way ogyihiin in xirfadahaani muhiim yihiin, carruurtu se inta badan ma helaan waqti ku filan ay ku sameeyaan marka ay dugsiga joogaan. Laakiin se guryaha waxaa ka jira fursad fiican ay ilmuhu ku baran karaan waxyaabo badan iyaga oo ciyaaraya ama sameynaya howlaha maalinlaha ah sida cunto karinta.

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:** waxqabadyada intooda badan waxaa ku jira fikrado ku tusinaya sida aad isbeddel ugu sameyn karto si ay u sameeyaan waxqabadkaas ilmaha naafada ahama kuwa leh duruufaha waxbarasho ee gaarka ah. Dhammaan waxqabadyadaan carruurtu waa ay sameyn karaann, balse carruurta qaar waxay u baahnaan karaan caawimaad dheeri ah, ama se waxay u sameyn karaan siyaabo ka duwan (sida sawir ama hadal halka ay ka qori lahaayeen; ama se wayba soo gaabsan karaan). Bogga xiga waxaad ka helaysaa fikrado badan oo ku saabsan sida aad waxqabadyadaan u sameyn karto. Waalida ahaan waad fahmi kartaa ilmahaagu waxyaabaha ay ku wanaagsanyihiin sidaa awgeed Waxaa kuu kuu fudud in aad caawiso.

**Xusuusnow, waxbarashadu waxay ka dhacdaa meelkasta iyo xilli kasta.**

# Waxqabadyada ku habboon carruurta naafada ah iyo kuwa leh baahiyaha waxbarasho ee gaarka ah.

Sanduuqa ku yaalla qeybta hoose ee waxqabad kasta waxaad ka helaysaa sida aad wax uga beddelayso ama ugu doorayso waxqabadka ku habboon carruurta naafada ah iyo kuwa leh baahiyaha waxbarasho ee gaarka ah. Ilmo kasta wuxuu leeyahay xaalad u gaar ah sida darteed waxaa jira habraac guud. Inta badanna ilmuhu iyaga ayaa nagu hagaya waxa ay doonayaan. Marka aan la shaqaynayno caruurta, natiijo wanaagsan ayey ku helayaan caawinteenna, annaguna waxaan ogaanaynaa waxa ay ku wanaagsanyihiin, waxa ay jecelyihiin iyo meelaha caawimaadda nooga baahanyihiin.

Way wanaagsan tahay inaad caawiso carruurta, balse iska ilaali inaad u sameyso waxqabadka iyaga-waxay u baahanyihiin inay dareemaan inay waxqabteen. Ha iska dhaadhicin in ilmuhu uusan sameyn karin waxqabadka. Waxaad heli kartaa habab wanaagsan oo ay ula qabsan karaan howsha, qofkastana uu sameyn karo.

Hoos waxaad ka helaysaa talooyin ku aaddan carruurta baahiyaha gaarka ah leh ama waxbarashadu ku adagtahay. Talooyinkaan waxaa loo adeegsan karaa waxqabad kasta.

## Carruurta uu araggu ku adagyahay

- **Adeegso Xarfaha waaweyn:** haddii waxqabadku uu la xiriiro qoraal, hubi in ilmaha ay u sahlantahay inuu akhriyo xarfaha waaweyn iyo kuwa yaryar. Mararka qaar, xarfaha yaryar ayaa fiican sababtoo ah waxay leeyihiin 'qaab' mana ahan xarfo 'xiran' sidaa awgeed si fudud baa loo garan karaa,loona akhrin karaa.
- **Adeegso Midabo:** isticmaal midabbo kala duwan, haddii ay macquul tahay, marka aad qoraysid dhismaha aasaasiga ah ee jumlada (tusaale ahaan qodbaha afka '-ka' ama '-da' amase ficillada guud sida 'dhihid' 'keenid' siin'). Waxay u fududaynaysaa ilmaha inuu si sahlan wax u qoro ama u akhriyo.
- **Adeegso wax taabasho leh:** marka aad sameynayso ama dhisayso walxaha, carruurta araggu ku adagyahay way 'dareemi' karaan ama 'taaban' karaan waxa ay sameynayaan. (tusaale ahaan, marka aad dabaq (taawar) sameynayso adigoo adeegsanaya agab kala duwan).
- **Sharrax sawirada:** marka ay sawirro ka mid yihiin waxqabadka, xusuusnoow inaad ilmaha u sharraxdo sawirka.
- Xusuusnoow, talooyinkaan waxay carrurta u caawiyaan si weyn, xataa kaliya ma ahan kuwa araga ku adagyahay.

## Carruurta uu maqalku ku adagyahay

- **Adeegso luuqadda dhagoolayaasha:** haddii aad adiga iyo ilmahaagu wax uun ka fahmaysaan ama si wadajir ah u barta inta aasaasiga ah.

- **Si toos ah u qaabbil** ilmaha uu maqalku ku adagyahay ama aan si fiican u hadli karin (haku qeylin). Isticmaal luuqadda jirka, dareenka wajiga iyo tilmaan gacmeed si aad ugu gudbiso waxa aad ula jeeddo.
- Kusamee waxa la qabanayo meel kuhaboon sida meel iftiin leh si ay ilmaha u arki karaan dhaqdhaqaaqa bishimaha. U hadal si deggan oo la fahmi karo.
- Adeegso qalin rasaas iyo warqad (ama jeesto iyo sabuurad) si aad wax u qorto marka howsha lagu jiro, ama u sawir walxaha si aad ugu caawiso inuu fahmo.
- Si muuqda u tus carrurta waxa la qabanaayo haddii ay macquul tahay halkii aad u sharrixi lahayd oo kaliya (af ahaan ama luuqadda dhagoolayaasha
- Xusuusnoow, talooyinka waxay si weyn u caawin karaan dhammaan carrurta, kaliya ma ahan kuwa maqalka uu ku adagyahay.

## Carruurta aan socon Karin

- Usoo dhowee agabka iyo walxaha la adeegsanayo: Hubi in dhammaan walxaha looga baahanyahay waxqabadka inay yaallaan meel ilmuhu gaari karo.
- Ku dadaal in cabbirka walxaha ay ahaadaan kuwa ilmaha ka caawinaya inay iskuxir sameeyaan: (tusaale ahaan, qalin rasaas weyn ama qalimmadu waa kuwa si sahlan loo qabsan karo).
- Hag oo ka caawi shaqada meeshii macquul ah, (tusaale ahaan, waxaad u baahantahay inaad ka caawiso tuurashada laadhuuga marka shax la ciyaarayo).
- Soo koob baaxadda: waxka beddel waxqabadka si goob kooban loogu qabto adigoo yareeynaya dhadhaqaaqa, (tusaale ahaan marka la sameynayo waxqabadyada baadi-goobka ama xasaynta waxaa lagu sameyn karaa hal qol gudihiiis halkii lagu sameyn lahaa guriga oo dhan ama dayrka).

## Carruurta ay waqtiga badan ku qaadato inay wax bartaan ama fahmaan


- **Waxqabadka u fududee ama samee qeyb ka mid ah waxqabadka** (tusaale ahaan heesta, kaliya hal tuduc ee heesta ugu hees 'New Song, Old Tune'; qor liis kooban marka liis la sameynayo. Ilmaha waa inuuu qoraa hal erey halkii uu ka qori lahaa jumlada oo dhan si uu u muujiyo aragtidiisa.
- **U sawir halkii aad ka qori laheyd.** Waxqabadyo badan waxay la xiriiraan sawirro. Waxqabadyada ilmaha laga doonayo qoraalka, waxay sameyn karaan inay sawiraan halkii ay ka qori lahaayeen.
- **U kala qeybi tilmaamaha** sida ugu sahlan weydiina ilmaha inay mid sameeyaan isla markaas. (tusaale ahaan, 1. Qalin iyo warqad soo qaado, 2. Sawir walax, 3. Midabee iyo 4. Dhammeystir adigoo calaamadeynaya).
- **Ku celi tilmaamaha laba ama saddex jeer** si ilmuhu u qaato una fahmo macluumaadka.

Markasta u oggolow ilmaha inay hoggaamiyaan waxqabadka. Iyagaa kuu sheegaya haddii ay fahmeen ama ay ka heleen waxqabadka iyo in kale. Si madax bannaan u caawi culaysna haku saarin ilmaha shaqada. Waxay kaa caawinaysaa in aad ogaatid in waxqabadku uu adag yahay oo aad markaas u beddeshid waxqabad la wada sameyn karo. Waxaad dhihi kartaa "waxaan filayaa in uu waxqabadku adagtahay, soo ma ahan?" ma wada sameyn karnaa?

# Buugga alifbeetada

**Waxa aad u baahantahay:** Qalin-rasaas (midabbo leh haddii aad heli karto), warqad, koollo ama cirbad iyo dun iyo qardhab.

## Waxyaabaha la qabanayo:




- Soo qaado waraaqo iyo qalin rasaas midab leh.
- Waxaad sameynaysaa buugga alifbeetada. Isku laab qeyb ka mid ah warqadda. Immisa waraaqood baad u baahnaan kartaa?
- Qorshee sida aad u sawirayso xarfaha. Ma hal xaraf baa boggiiba? Mise labo?
- Ka fikir sida aad u sawirayso xarfaha. Ma waxay noqonayaan kuwa waaweyn?
- Ma waxay noqonayaan kuwa ? This seems direct translations Midabee sawiraadda haddii aad heli kartid midabo.
- Ku dar ereyo ka bilowda xarfaha alif ba-da bog kasta. Maku daraysaa sawirrada walxaha ama xayawaannada magacyadoodu ay ka bilowdaan xarafkaan?
- Naqshadee oo sawir jaldiga buugga. Xusuusnoow inaad magacaaga ugu qorto soo saare ahaan (ama qoraaga buugga)
- Isku laab buugga oo weydii qofkaa weyn inuu kuugu dhajiyo koollo ama qardhab.

**Waxqabad dheeri ah:**

- Akhri ama weydiiso cid kale inay kuu akhrido sheekadaan hoose.

  **Jahwareerka Alifbeetada**

  Maalin ayaa mataanaha "Ali iyo 'Abdi' ay go'aansadeen inay wax uun madadaalo ah sameeyaan. Hadda ba, waxay ka fikireen in ay isdabo mariyaan dhigaalka dhowr erey oo Soomaali ah si loogu jahwareero. Waxa ay erayga 'dab' ku beddeleen 'bad' markaas ayaa baddii oloshay. Erayga 'rag' ayay booskiisii ku beddeleen 'gar' kolkaas ayaa martidii la sugayey waxa ay wada noqdeen gar. Sidoo kale, booska ereyga 'cab' ayey ku beddeleen 'bac' saa waxay noqotay wiilashii ay biyaha bac ku qaataa. Erayadii ay isku beddeleen waxay jahwaeerisay micnahii sheekada, mataanihiina waxay u noqotay qosol iyo madadaalo.

- Maka sameyn kartaa sheeko aad adigu leedahay ee shaxda Alifbeetada?

**Da'da:** Dugsi hoose

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad dhexe

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Alifbeetada, kobcinta luuqadda, ereyo cusub, hingaadda.

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Hal'abuurka, isku-xirka iyo naqshadda.

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Hees ka samee alif ba-da.
- Weydiiso qof kale inuu kaa caawiyo sameynta buugga.
- Adeegso dhagxaan yaryar ama jab quraarado si aad alif ba-da ugu sameyso miiska ama dhulka.

# Dhisidda dhisme dheer

**Waxa aad u baahantahay:** Kartoon ama bacaha wax lagu qaato, sanduuq yar iyo dhagax ballaaran.

## Waxyaabaha la qabanayo:



- Soo aruuri walxo siman oo ballaaran intii aad heli karto. Waxaa ka mid sanduuqyada, kartoomada, buugaagta, dhagxaanta siman, quraarado caag ah oo dabool leh.
- Isku day inaad taawarka ku dhisto walxahaas. Maxaad ka fahantay?? Walaxdee baa la dulsaari karaa kuwa kale? Maxaa dhacaya haddii aad walxaha yaryar aad qeybta hoose ee taawarka aad dhigto?
- Dherer intee le'eg baad gaarsiin kartaa taawarka? Maxaa taawarka u sababi kara inuu dhaco ama taagnaado? Sidee ku xoojin kartaa taawarka?

**Da'da:** Dugsi hoose

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad yar

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Iskudheellitirka, naqshadda.

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Tijaabin, hal-abuurkaga, iskuxirka iyo inaad waxa kugu xeeran ogaatid.

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Weydiiso qof kale inuu kaa caawiyo dhismaha taawarka.
- Haddii araggu kugu adagyahay, adeegso walxaha la taaban karo si aad taawarka u ogaato.
- Haddii ay kugu adagtahay iskudheellitirka walxaha, adeegso walxo waaweyn oo iskudheellitirkoodu fudud yahay.

# Xujo samayn

**Waxa aad u baahantahay:** Agabyo alwaax ah, walxo waaweyn sida kartoomo safiito kasameysan, taayerada duugga ah iwm.

## Waxyaabaha la qabanayo:

- Xujadani waxay noqoneysaa walxo dhowr ah oo wada socda kuwaas oo lagaaga baahanyahay inaad fuusho, ama ka dusto ama aad ka booddid. Waxay isugu jirtaa orod, boodid, fuulid, guurguurasho ama iskudheelitir. Waxaad ka dhigi kartaa xujo sahlan ama mid adag hadba sida aad jeceshahay. Fiiri sawirka tusaalaha ah.

- Raadi meel bannaan (gudaha ama banaanka) halkaas oo aad ku sameyn karto xujada. Soo aruurso walxaha aad ku dhisayso xujada: tusaale ahaan, dhowr xabbo oo alwaax ah, dhagxaan waaweyn oo ah kuwo lagu istaagi karo, shaagagga/taayarrada duugga ah iyo agabyo kale . Hubi oo weydii qof weyn haddii ay caadi tahay in waxyaabahaas aad isticmaali kartid.



- Qaabee oo samee xujadaada. Ka fikir cidda loogu talagalay xujo furka. Ka dhig caqabado la xalin karo oo macquul ah.
- Iskuday adigu xujadaada—ma jiraan wax aad ka beddeli lahayd? Weydii qof kale inuu waqti kuu qabto marka aad xujada sameynayso. Ilaa intee baad ku sameysay?



**Da'da:** Dugsi hoose

**Nooca Caawimaada/Taageerada walaalidka weyn:** Caawimaad dhexe

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Naqshadayn, dhisme

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** hal'abuurkaka, iskudheelitirka jirka, xallinta mushkiladah iyo garashada waxyaabaha kugu xeeran.

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**


- Uga dhig xujada mid fudud qofka uu socodka ku adagyahay ama uu araggu ku adagyahay. Kusoo dar socod ay sameyn karaan sida wareegga ama guurguurasho ama walxaha taabashada leh sidaas awgeed waa ay isku dayi karaan.

# Xisaabin

**Waxa aad u baahantahay:** Qalin-rasaas ama qalin caadi ah iyo warqad, iyo jeesto.

## Waxyaabaha la qabanayo:


- Sawirkaan hoose warqad ku wareeji/ ku dul dhig ama raadi meel fidsan oo aad ku sawiri karto jeestada.




- Ciyaartani waa mid tiro ah (Xisaab ah). Waxaad ka bilaabaysaa 'BILOWGA' waxaad na raacaysaa xarriiqda ilaa 'DHAMMAADKA'. Waxaad marin kartaa xarriiq toosan ama mid laalaab ah (isdhaaf ah ama sidii kale aad sameyn karto).


- Marka aad raacayso xarriiqda waxaad xisaabineysaa oo aad isku daraysaa tirada aad soo martay, sidaas baad ku dhammeynaysaa ilaa lambar ka uu danbeeya.

- Tusaale ahaa: intee hab oo kala duwan baad ku sameyn kartaa lambar 8?





**1.**

2 x 4 = 8




**2.**

2 + 2 + 4 = 8




**3.**

3 x 4 – 4 = 8

(12) – 4 = 8

Jawaabta: Waxaa jira saddex hab oo kala duwan

- **Qaacidadu/xeerku waa:**
  - Hab kasta waa inuu ka duwanyahay habka kale
  - Xarriiqda ma marsiin kartid hal mar ka badan
  - Markasta oo aad dhaafto ama ka gudubtid lambar waa inaad adeegsataa iskudar, kala jar ama iskudhufasho si aad lambarkaas xisaabtaada ugu darsato.

- Ma garan kartaa hab aad ku heli karto lambar 10? Ma jiraan laba hab oo aad ku heli karto lambar 16? Qor xisaabtaada.

- Maxay yihiin hababka kale oo aad u sameyn karto lambarka u dambeeya? Muxuu yahay lambarka ugu weyn ee aad sameyn karto? Muxuuse yahay lambarka ugu yar ee aad sameyn karto? Guud ahaan immisa lambar oo dhammaadka ah baad sameyn kartaa?

## Waxqabad dheeri ah:

- Qof kale sii lambarka ugu dambeeya oo weydii inuu soo helo habka ay ku timid ama waddada uu u maray.Waxay heli karaan hab ama jid fudud oo ay ku timid.

- Ku beddel lambarrada sawirka kuwo aad adigu leedahay. Lambar kasta waa la adeegsan karaa balse ku dadaal inay ahaadaan hal god ama laba god.

- Sidoo kale waxaad adeegsan kartaa jajab si aad xoogaa u adkayso. Tusaale ahaan, 0.5x4 = 2 ama 2.5x5= 12.5

**Da'da:** Da' kasta

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad dhexe

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Xisaabin, iskudar, kala goyn, isku dhufasho.

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Xallinta caqabadaha, Fikir qoto dheer, wadashaqayn iyoxiriir.

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Ku samee shax weyn sagxadda guriga (dhulka) adigoo adeegsanaya jeesto, isuguna xir hab kuu fududeynaya inaad xusuusnaato xisaabta.
- Haka badin lambarrada sawirka aad ku dul qorayso 1 ilaa 5.
- Raadi habab kala duwan oo aad isugu xiri karto 'bilow' ilaa 'dhammaad' oo xisaabi inta lambar aad dul marisay (adigoon u baahnayn inaad isku darto)

# Cunto karin miisaaman

**Waxa aad u baahantahay:** Qalin-rasaas ama qalin caadi ah iyo warqad, iyo weelka wax lagu kariyo iyo alaabaha aad cuntada ka sameyn lahayd.

## Waxyaabaha la qabanayo:

- Go'aanso waxa aad jeclaan lahayd inaad kariso. Qoro waxyaabaha aad wax ka sameynayso adigoo walaalka ka weyn ama waalidka caawimaad weydiisanaya haddii aad u baahato.
- Qor liiska alaabta aad wax ka sameynayso (waxa aad karinayso) ee aad u baahantahay.
- Xisaabso inta qof ee aad u karinayso. Dadka aad wax u karinayso immisa ayaa qofkiiba ku filan?
- Muxuu yahay caddadka ama xaddiga loo baahanyahay haddii aad wax u karinayso dad badan laba jeer? Ama dadka kala barkiis? Laba qof iyo ka badan?
- Soo diyaarso wixii aad wax ka sameyn lahayd iyo weelkii aad ku sameyn lahayd ba (digsiyada iyo saxamada). Cabbir shay kasta oo aad wax ka sameynayso.
- La tashi ka samee tallaabooyinka aad qaadayso iyo tilmaanta aad raacayso ee alaabaha aad wax ka sameynayso, mid kastana qor. Adeegso ereyo si aad u qeexdo waxkarinta sida 'burburin/tumid', 'fiiqid' ,'walaaqid' iyo 'isku qasid'.
- Raac tallaabo kasta ee alaabta aad wax ka sameynayso adigoo ku salaynaya tilmaamaha kuu qoran, hana ahaadeen tallaabooyinkaas kuwa la fahmi karo oo qofkasta raaci karo sida ugu macquulsan.
- Marka aad dhammeyso cunto karinta, u yeer qoyska si ay u cunaan wixii aad karisay.
- Ka fikir sida aad ugu qeybin lahayd dadka wixii aad karisay si siman. Immisa qaaddo/jab/xabbo ayuu qof kasta leeyahay? Maku filnaan kartaa dadku inay cunto labaad helaan?

## Waxqabad dheeraad ah:

- U qor habka aad wax u sameysay si cad oo qofkasta fahmi karo oo la raaci karo. Weydii inay sidoo kale sameeyaan iyagoo raacaya tilmaamahaaga si aad u ogaato in sida ay ahayd u raaceen ama ay wax ka beddeleen.




- Dooro cuntooyin aad kala qeybin karto oo u kala qeybsama si jajab ah, sida sawirka kore ka ka muuqata , (buskud, doolshe ama khudaar aad kala jarjartay).

- Sameyso buugga cuntada oo aad ku qoroto dhammaan cuntooyinka aad jeceshahay.

**Da'da:** Da' kasta

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad dhexe/sare

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Tirada, xisaabinta, cabbiraadda, qorshaynta alaabaha iyo kobcinta luuqadda.

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Hal-abuurka xallinta mushkiladah, fakarka qotoda dheer, wadashaqaynta, xiriirka, iskuxrka

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Weydiiso qof kale inuu kaa caawiyo cunto karinta
- Dooro qeybaha cunto karinta ee aad sameyn karto. Ma isku qasi kartaa? Ma ku shubi kartaa waxyaabaha aad wax ka sameynayso qeybtood?
- Sii tilmaame/hage cod ah halka aad mid qoran siin lahayd..
- Weydii qof kale inuu qoro tilmaamaha.
- Sawir ka samee tallaabo kasta oo cunto sameynta ah


# Naqshadee shax ciyaareed

**Waxa aad u baahantahay:** Qalin-rasaas midab leh ama qalin caadi ah ,warqad ballaaran, maqas, laadhuu iyo walxo yaryar.

## Waxyaabaha la qabanayo:

- Waxqabadkaan wuxuu usoo dhowyahay ciyaarta Barbaraalleyda ee ay Soomaalidu caanka ku tahay

- Soo diyaarso warqad iyo qalin-rasaas midabo kala duwan leh haddii aad heli karto. Dul saar warqadda ballaaran oo aan waxba ku qornayn oo dhig miis ama meel siman oo dhulka ah.




- Ku sawir warqadda waddo qalloocsan, unaqeybi waddada goobo/boosas kala jarjaran oo afar gees ah mid walba. Labada gees ee waddada ka dhig midna bilow midna dhammaad. (Fiiri sawirka sare).

- Qeyb ka mid ah wareegyada afar geesta ah ku qor 'kaarka qaado', qaar kalena waxaad ku qortaa 'dib u laabo 2 boos' ama 'Dib u noqo iyo waxaad lumisay fursaddaada. Ma haysaa aragti kale sida dib loogu celin karo ama horay loogu wadi karo qofka kula ciyaaraya? Inta badan boosaska/goobooyinka ha ahaadeen kuwa bannaan oo aan waxba ku qornayn. Waxaad u baahantahay inaad adkayso ciyaarta si ay xiiso u yeelato, laakiinse haka dhigin mid aad u adag oo aan la sameyn karin.

- Si aad kaararka u sameyso, soo qaado waraaqo yaryar oo wareegsan kadibna kala jarjar. Dhinac ka mid ah warqadda waxaad ku qortaa tilmaamaha/hagaha. Noqo qof hal-abuur leh oo iskuday inaad sameyso tilmaamo kala duwan. Tusaale ahaan:
  - Xisaabta: Xisaabi 3 ilbiriqsi, 6 ilbiriqsi iyo 8 ilbiriqsi
  - Ficillada muuqan kara: addex jeer wareeg samee, dib u noqo, istaag oo madaxa iyo caloosha qabso oo tiri ilaa 20 ilbiriqsi.
  - Abuur liis ereyo ah oo cod ahaan loo qaadi karo.
  - Hees qaad
  - Aqoon guud: magacow 5 magaalo oo caasimado ah.
- Yaa kula ciyaaraya ciyaarta? Hal qof mise ka badan? Sii qof kasta walax yar oo uu ku tuuro xarriiqda (Waddada).

- Dadka kale ee kula ciyaaraya isku raaca xeerarka ciyaarta. Yaa hor tuuranaya? Maxaa dhacaya haddii qof uusan tuuran ciyaarta? Caawimaad ma weydiisan kartaa qof kale? Xarriiqda ma laga gudbi karaa? Marka aad isku raacdaan xeerarka, markaas kadib ciyaarta waad bilaabi kartaan.

- Dhig kaarka ciyaarta isagoo gambisan shaxda ciyaarta agteeda. Qofkasta mar ayuu leeyahay oo uu kutuurto laadhuuga. Walax yar sida dhagax oo kale ayey ku tuuranayaan lambarka laadhuugu u soo saaray meesha uu kaga aaddanyahay shaxda ciyaarta.

- Xaggee ayey ugu dhacday? Raac wixii laguu sheego. Marka qof uu helo "kaarka qaado', markiiba ha qaato oo ha ku shaqeeyo, haddii qof ka mid ah uusan raacin xeerka ciyaarta, ku fuli sharciga ciyaarta. Qofka ugu hor gaara dhammaadka ayaa guulaysanaya.

**Da'da:** 8 sano iyo ka weyn.

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad dhexe

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Adeegsiga lambarrada, kobcinta luuqadda.

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Xiriir, wadashaqeyn, u kuurgalid iyohal-abuur.

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Qof weyn kusoo dar si uu ula ciyaaro
- Ciyaarta fududee adigoo qeybo ka mid goobooyink/boosaska meesha ka saaraya.
- Ku sawir jeeso xarriiqaha (Waddada) si loogu dul socon karo shaxda ciyaarta.

# Ma aragtaa waxa aan arko?

**Waxa aad u baahantahay:** Qalin-rasaas ama qalin caadi ah iyo warqad

**Waxyaabaha la qabanayo:**

- Sawir samee
- Ka dib, qor tilmaamaha sida aad u sawirayso sawirka
- Qof kale u yeer oo u sheeg inuu sawirka sameeyo isaga oo tilmaamahaaga raacaya hana tusin sawirkaaga.
- Marka ay dhammeeyaan, isbarbardhig labada sawir. sidee kuula muuqdaa? Ma isku mid baa mise waa kala duwan yihiin? Maxay tahay sababta ay u kala duwanaadeen? Maxaa sababay inay aad isku mid u noqdaan?

**Da'da:** Da' kasta

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad yar

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Tilmaam qorid, kobcinta luuqadda.

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Xiriir, iskuxir, hal-abuur.

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**


- Tilmaamaha afka ka sheeg halkii aad qori lahayd.
- Jil sawirkaaga
- Ciidda ama dhoobada sawirka ka samee ama ciidda ku sawir.

# Sawir xayawaan cajiib ah

**Waxa aad u baahantahay:** Qalin-rasaas midab leh ama qalin caadi ah iyo warqad

## Waxyaabaha la qabanayo:

- Soo diyaarso warqad iyo qalin-rasaas, waliba dhowr xabbo qalin-rasaas midabbo kala duwan leh haddaad heli karto.
- Bal suurayso bisad leh jirka maroodiga oo kale? Ama ey qalfoof leh sida diinka oo kale? Sidee bay u ekaan lahaayeen?
- Sawir xaywaankaaga khiyaalka ah una samee qeybaha kala duwan jirka xayawaanka oo magacyada ku qor.




## Waxqabad dheraad ah:

- **Bal qiyaas:** xaggee ku noolyahay? Adduunkeenna mise meel kale? Adduun noocee ah? Muxuu cunaa? Sidee ayuu u dhawaaqaa? Sidee ayuu u socdaa? Sidee jirkiisu uga duwan yahay jirka xayawaanka kale? Sidee ayuu ku yeeshay qeybaha kala duwan ee jirkiisa?
- **Sheeg ama qor sheeko** ku saabsan xayawaanka.
- **Akhri Sheekadaan soo socota** (ama qof kale weydiiso inuu kuu akhriyo) si aad fikrad uga hesho sheekadan.

## Dhurwaa iyo Bakayle

Dhurwaa ayaa khudaar suuqa ku iibin jiray, Bakayluhuna mar kasta wuu la kaftami jiray. "Uma ordi kartid sida aan u ordi karo, miyaad awooddaa?" Bakaylihii ayaa ku kaftamay"Waxaad tahay nin oday ah oo aan xitaa si fiican wax uarki karin".

Bakaylihii ayaa ku hor ciyaaray Dhurwaagii, wuxuuna isku dayey inuu qabto, wuuse awoodi waayey. Bakaylihii wuu tagay isaga oo qoslaya.

"Wuu arki doonaa" Dhurwaaga ayaa naawilaya maalin uun inuu qaban doono Bakaylaha . Sidaa darteed, wuxuu iska dhigayey in uusan wax badan arki karin wuxuuna xirtay ookiyaale/muraayado madow.

Bakaylihii si tartiib ah buu usoo socday isagoo geesinnimo muujinaya aad buuna ugu soo dhowaaday dhurwaaga. Ka dib, Dhurwaagii hal mar buu soo booday oo Bakaylihii dhagta qabtay. "Hadda ma carari kartaa", Dhurwaagii wuxuu iska dhigay mid Bakaylaha dhagaha ka cunaya. Bakaylihii wuu naxay oo murugooday laakiinse dhurwaagii intuu hadba dhag qabto ayuu u ruxaa kor iyo hoos. Dhagihii Bakaylaha way dheeraadeen ilaa ugu dambayn ay noqdeen dhago adag oo ballaaran. Nasiib wanaag, Bakaylihii halmar ayuu ka baxsaday daamankii dhurwaaga (dhurwaaga duqa ah ilkihiisu ma ahayn kuwa fiican). Bakaylihi si fiican ayuu u cararay intii uu awooday. Wuxuu ka cararay magaaladii, suuqii iyo Dhurwaagiiba. Taasi waa sababta aynu u aragno Bakayluhu inuu dhago waaweyn leeyahay.

**Da'da:** Dugsi hoose

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad yar

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Qaababka iyo midabada, luuqad qeexitaan

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Iskuxir, hal'abuur

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Sharrax xawayaan, una tilmaam qof kale inuu sawiro.
- Adeegso ciid/dhoobo, quraarado iyo caagado si aad xawayaanka u qaabayso.

# Sawir magaaladaada male-awaalka ah

**Waxa aad u baahantahay:** Warqad iyo qalin-rasaas (qalin-rasaas midab leh)

## Waxyaabaha la qabanayo:

- Soo qabso warqad ballaaran iyo qalin-rasaas
- Weydiiso qof kale inuu qoraalkaan soo socda si tartiib ah oo cod-dheer kuugu akhriyo adiguna indhaha isku qabso oo ka fakar.

  Indhaha isku qabso oo bal ka fikir magaaladaan. Bal qiyaas waxaad lugaynaysaa waddada magaaladaada. Magaaladu sidee ayay u egtahay? Dhismayaal noocee ah ayey leedahay? Dhismaayaashu intee dherer le'egyihiin? Gaadiid noocee ah baa magaalada laga isticmaalaa? xarun tareen ma leedahay? Ma magaalo cagaaran oo dhir iyo beero leh baa? Mise waa magaalo aan wali la gaarin oo gawaari duusha leh baa? Muddo kooban ka fakar magaaladaas?

- Indhaha kala fur. Sawir magaalada. Qorshee meesha aad dhismayaasha ka bilaabayso iyo waxyaabaha aad ku darayso magaalada. Marka hore naqshadda guud samee ka dib dhammeystir inta hartay. Adeegso midabbo haddii aad helaysid.
- Magacee u bixinaysaa magaalada?
- Mar labaad fiiri magaalada, waxyaabo kale ma illowday? Goobihii cibaabada? Goobihii taariikhiga (madxafkii)? Ka waran wabigii iyo meelihii lagu ciyaarayey? Ka waran goobaha dadkii naafada ahaa? Ka dhig magaalada mid weyn oo waxaan oo dhan ku dar.




**Da'da:** Dugsi hoose/dhexe

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad dhexe

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Kobcin luuqadeed, cabbiraadda, sida magaalooyinku u shaqeeyaan

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Hal-abuurka, qorshaynta, naqshadaynta iyoxallinta dhibaatooyinka.

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Sii qof kale tilmaamaha waxa laguu sawirayo.
- Ku dhis magaaladaada sanduuqyo bokis maran, kartoommo, ulo iyo dhagxaan.
- Sawir tuulo beereed ama magaalo yar halkii aad magaalo weyn sameyn lahayd

# Waxyaabaha aad xiisayso

**Waxa aad u baahantahay:** Qalin-rasaas ama qalin caadi ah,warqad iyo midabbo kala duwan

## Waxyaabaha la qabanayo:

- Saar gacantaada warqadda dusheeda dabadeedna qalin soo qaado oo ku dul sawir qaabka farahaaga.
- Sawirka suulkaaga ee aad sawirtay u sameemidabka aad ka jeceshahay. Ma u sameysay midab?
- Faraha kale ee soo haray mid kasta oo ka mid ah ku dul qor waxyaabaha aad jeceshahay sida dugsigaaga, cuntada aad jeceshahay, ciyaarta aad ka hesho iyo xawaayaanka aad jeceshahay.
- Warqadda inteeda kale ku qurxi oo ku sawir waxyaabaha kale ee aad jeceshahay.



**Waxqabad dheeraad ah:**

- Samee waxyaabo kala duwan si aad ugu dul qorto farahaaga, waxay noqon karaan waxyaabaha kale ee aad xiisayso: caasimadaha, agabka guriga yaalla, waxyaabaha aad sameyso iyo wax la mid ah.



**Da'da:** Dugsi hoose

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad hoose

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Kobcin luuqadeed

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Hal-abuurka, iskuxirka

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Weydii qof kale inuu gacantaada ku dul sawiro warqadda.
- U sheeg qofka waxyaabaha aad ka hesho oo u sheeg inuu kuu qoro.
- Ka fikir waxyaabo kale aad ka hesho oo aad ku darto

# Doontaada sabbaysii

**Waxa aad u baahantahay:** Caagad shablaan ah oo la isticmaalay, warqad ama maro, dhagax

## Waxyaabaha la qabanayo:

- Raadi caagado shablaan ah oo la adeegsaday ama shay kale caag ah si aad doon uga dhigtid. Naqshadee doontaada, shiraac ma u sameynaysaa?
- Dul saar doontaada baaldi biyo ah ama barkad yar. Sidee bay u sabbaynaysaa? Ma Ku socodsiin kartaa biyaha dushooda?
- Soo uruurso xoogaa dhagxaan ah. Immisa dhagax bay qaadi kartaa? Marba dhagax ku kordhi ilaa inta ay ka quusayso.



## Waxqabad dheeri ah:

- Doon maka sameyn kartaa walxo kale? Tusaale ahaan warqad.Tani wax maka beddelaysaa inta dhagax ee ay qaadi karto doontii hore.

**Da'da:** Dugsi hoose

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad hoose iyo mid dhexe

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Sayniska (Fiisigis), cufka walxaha

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Hal'abuurka, iskuxirka, naqshadaynta

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Tijaabi walxo kala duwan inay quusaan iyo in ay sabbeeyaan.
- Waxqabadkaan samee marka aad barkadda ku jirto ama bullaacadda jikada.

# Ganacsi bilaabid

**Waxa aad u baahantahay:** Waxyaabaha aad suuqa ku 'iibinayso', qalin-rasaas iyo warqad, dhagxaan ama furar-caag.

## Waxyaabaha la qabanayo:

- Raadi goob aad ka sameysato suuqaaga yar ee male-awaalka ah. Waxay noqon kartaa miis yar ama meel yar oo bannaan oo dhulka ah.
- Go'aanso wixii aad meesha ku iibin lahayd. Cunto? Dhar? Buug? Mise waxyaabo kala duwan?
- Soo aruurso waxyaabaha aad iibinayso. Weydii waalidka ama walaalka kaa weyn haddii ay caadi tahay inaad alaabta soo daynsato marka hore. Sidoo kale waxaad adeegsan kartaa dhagxaan, badhammo, quraarado, caleemo, laamo iwm si aad uga dhigto waxa aad iibinayso.
- Adeegso dhagxaan yaryar ama furarka caagadaha oo lacag ahaan u isticmaal. Raadso sanduuq yar si aad lacagta ugu ridato. Waa kuu diyaarsanyihiin waraaqihii iyo qalimadii waad na garan kartaa qiimaha aad ku iibinayso.
- Soo bandhig dukaankaaga yar. Si qurxoon alaabta u kala dhig. Warqad yar qiimaha alaabta ku qor oo ku dhaji shay kasta oo aad haysid.
- Yaa kuu imaanaya? Walaalahaa? Qoyskaaga? Fur dukaankaaga oo macaamiisha ku casun inay kuu yimaadaan?
- Xiiso u yeel dukaanka oo mararka qaar waxyaabaha ay doonayaan macaamiishu ma hayo dheh si aad alaabo kale ugu soo bandhigto. Ama qiimaha alaabta qaali ka dhig una sheeg sababta. Makaa aqbaleen qiimaha sarreeya?



**Da'da:** Dugsi hoose

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad dhexe

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Iskudarka iyo kala jarka iyo xisaabinta qiimaha alaabta, luuqadda suuqa iyo wax iibinta

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Xiriirka, gorgortanka, wadashaqeynta, hal'abuurka, xallinta mushkiladaha

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- La kaasho qof weyn ama walaal si qiimaha u sameysaan?
- Isbeddel samee oo qof kale ka dhig dukaanlaha iyo macmiilka.

# Immisa erey ...?

**Waxa aad u baahantahay:** Qalin-rasaas ama qalin caadi ah iyo warqad

## Waxyaabaha la qabanayo:

- Qor jumladaan Ingiriiska ah **"Learning at home is fun'**.
- Bal fiiri immisa erey oo kala duwan oo Ingiriis ah baad ka sameyn kartaa jumladdaan kana samee liis, tusaale ahaan: **Learn, ring, mat, lama, night**.
- Ma sameyn kartaa jumlo cusub oo Ingiriis ah oo aan ku jirin liiskaan?
- Ka fikir jumlado luuqadaada ah oo isku day immisa erey baad ka sameyn kartaa. Waxay noqon karaan jumlad isku mid ah ama mid kala duwan.
- Fiiri jumladaan Ingiriiska ah taas oo la adeegsaday xaraf kasta oo ka mid ah Alifbeetada Ingiriiska: **'The quick brown fox jumps over the lazy dog.'**
- Luuqaddaada maka sameyn kartaa jumlo ay ku dhanyihiin dhammaan xarfaha Alifbeetada luuqaddaada? Immisa erey bay ka koobantahay jumladdaas aad sameysay?

## Waxqabad dheeri ah:

- Samee sheeko kooban adigoo adeegsanaya ereyo cusub, oo qor.

**Da'da:** Da' kasta

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad yar

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Qoraalka, hingaadda, dhismaha jumlada

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Kala horraysiinta, isku xijinta, hal'abuurka

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Sawirka ereyada samee halkii aad ka qori lahayd
- Qof kale u akhri ereyada si uu kuugu qoro.

# Haddii aan madaxweyne ahaan lahaa ...

**Waxa aad u baahantahay:** Qalin-rasaas ama qalin caadi ah iyo warqad

## Waxyaabaha la qabanayo:

- Ka soo qaad madaxweynaha dalkaaga ayaad tahay. Maxay yihiin waxa ugu horreeya aad wax ka beddeli lahayd? Maxaad ka qaban lahayd waxyaabahaan soo socda:
  - Waxbarashada (tusaale ahaa macallimiinta iyo dugsiyada).
  - Deegaanka (Tusaale ahaan, ilaalinta waxyaabaha dabiiciga ah).
  - Adeegga Caafimaad (Tusaale ahaan, isbitaallada, dhakhaatiirta iyo kalkaaliyaasha).
  - Gaadiidka (Tusaale ahaan, sida dadku u safraan).
- Ma jiraan koox bulshada ka mid ah aad jeclaan lahayd inaad caawiso? Yey yihiin kooxdaas? Sidee baad u caawin lahayd?



## Haddii aan Madaxweyne ahaan lahaa …
## (Magacaaga: ……………………………)

Haddii aan ahaan lahaa madaxweynaha Somaaliya, waxaan sameyn lahaa …………………………… ka dib na waxaan sameyn lahaa ……………………………

Waxaa samayn lahaa ……………………………

Waxaan joojin lahaa ……………………………

Waxaan meesha ka saari lahaa ……………………………

Waxaan hubin lahaa in ……………………………

Saxiixay: ______________________

- Soo guuri jumladaan oo ku buuxi meelaha bannaan ereyo aad adigu leedahay.
- Ku dar jumlado kale haddii aad u baahantahay.
- Sidii khudbad madaxweyne u soo bandhig adigoo jumladaan ku akhrinaya cod dheer oo ay kalsooni ka muuqato.

**Da'da:** Da' kasta

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad yar

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Koboc luuqadeed, naxwe

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Hal'abuurka, fekerka qotoda dheer, xiriirka, fagaare ka hadalka.

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Weydiiso qof ku caawiya oo kuu qora jumladaada
- Sawir ka samee waxyaabaha aad doonayso inaad wax ka beddesho.
- Kaba soo qaad waxaad tahay guddoomiyaha xaafadaada, ama guddoomiyaha degmada ama siyaasi yar.
- Ku martiqaad qoyskaaga si ay su'aalo kuu weydiiyaan aadna uga jawaabto ka madaxweyne ahaan.

# La Sheekayso qof weyn

**Waxa aad u baahantahay:** Qalin-rasaas ama qalin caadi ah iyo warqad

## Waxyaabaha la qabanayo:

- Ka feker qof weyn oo aad jeclaan lahayd inaad la sheekaysatowaraysato. Qofkaasi wuxuu noqon karaa qof ehelkaaga qoyskaaga ah ama qof bulshada ka mid ah.
- Maxay tahay sababta aad u jeclaaan lahayd inaad ula sheekaysatowaraysato? Maxaad weydiin lahayd? Waaguu dhallinyarada ahaaCarrurnimadiisii miyaad wax ka weydiineysaa? Isbeddelkii uu soo arkay noloshiisa? ku dhacaya miyaad kala sheekaysaneysaa? Waxyaabaha uu khibradda u leeyahay miyaad weydiineysaa?
- Qor su'aalaha aad rabto inaad weydiiso. Isha mari su'aalaha oo lambarro u samee adigoo u kala hormarinaya sida aad jeceshahay inaad u weydiiso.
- Waxaad isku daydaa inaad walaalkaa kaa weyn ama qof kale oo weyn kusii barbarato/tijaabiso qaabka aad su'aalaha waraysiga ula samaynayso weydiin doonto. Tani waxay kuu fududayn doontaa inaad ogaatid haddii aad u baahantahay inaad su'aalaha wax ka beddesho iyo in kale. Qofka aad jeceshahay inaad waraysato si fiican saaxiib ma ula tahay? Ma hubtaa? Ma yahay qof doonaya inuu wax badan kaagakusiiyo waqti uu wax badan kaaga sheekeeyo sheekeeyo?
- Tijaabada ama barbarashada ka dib, su'aalihii aad jeceshahay inaad wax ka beddesho wax ka beddel. Ma waxaad u baahantahay su'aalo badan? Mise su'aalo yar? Wax su'aalo ah oo aad wax ka beddelayso ma jiraantaa?
- Waraysiga bilow. Ugana mahadceli qofka wakhtiga uu ku siiyey.

## Waxqabad Dheeraad ah:

- Qoraal ahaan u qor waraysiga kaas oo laga sii dayn doono idaacadaha ama lagu soo daabici doono wargeyska maxalliga ah.



**Da'da:** 8 sano jir iyo ka weyn

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad yar

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Koboc luuqadeed, barashada taariikhda qoyska ama bulshada

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Fekerka qotoda dheer, xiriirka, diyaarinta iyo qorshaynta waraysiyada

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Marka hore qof kale weydiiso inuu adiga ku waraysto si aad wax uga ogaatid qaabka su'aalaha
- Su'aalaha waraysiga qoraal waaweyn ku qor si loo arko.
- Su'aalaha ka dhig kuwa fudud oo la xasuusan karo.
- Weydiiso qofka aad wareysanayso inuu jawaabaha kuusoo koobo si ay kuugu fududaato qoraalkooda.

# Hindis qalab/Agab (mashiin ama qalab fudud)

**Waxa aad u baahantahay:** Qalin-rasaas ama qalin caadi ah iyo warqad

## Waxyaabaha la qabanayo:

- Waxaad ka fekertaa qalab (Mashiin ama qalab fudud) oo aad rabi lahayd inaad sameyso ama aad hal-abuurto. Maxaa lagu sameynayaa qalabkaas? Kaba soo qaad waa qalab dadka caawinaya, ma qaadan kartaa oo ma la safri kartaa? Muxuu ka sameysan yahay? Ma yahay qalab koronto isticmaala?

- Sawir ahaan u samee qalabkaas kuna qor magacyada qeybihiisa kala duwan. Maxay yihiin qeybaha kala duwan uu ka kooban yahayMaxaa qeybaha kala duwan ee qalabka loogu talogalay?

- Qor qalabkaaga waxa uu yahay. Ma sharraxi kartaa sida uu u shaqeeyo? Maxaad ku sameyn kartaa qalabkaas?

## Waxqabad dheeri ah:

- Ka samee qalabkaaga walxaha fudud ee horay loo soo adeegsaday. Tusaale ahaan, raadso sanduuqyo iyo caagado shablaan ah. Haddii aad doonaysid qor qeybaha kala duwan ee qalabkaaga.

- Qalabkaaga xayeysiin u samee. Sidee buu u xiiso gelinayaa bulshada? Maxay dadku qalabkaan ugu baahanyihiin? Sidee qalabkaani nolosha bulshada kor ugu ugu qaadi karaa? Muxuu qiimo ahaan kuuguu fadhiyaa? Xayeysiinta qalabkaaga kusoo daabac wargeyska maxaliga ah.



**Da'da:** Dugsi hoose

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad yar

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Koboc luuqadeed, wax qoridda, hingaadda

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Hal'abuurka, xallinta mushkilada, fekerka qotoda dheer, xiriirka, ku baraarugsanaanta waxa kugu xeeran

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Qof kale weydiiso inuu kuu sawiro
- Naqshadda qalabkaaga dhulka ku sawir
- Qof kale ka codso inuu magacyada kugu qoro qalabka.

# Dib u habeynta alaabaha loo adeegsaday

**Waxa aad u baahantahay:** Walxaha dib loo isticmaali karo iyo baco, qalin-rasaas ama qalin caadi ah iyo warqad.

## Waxyaabaha la qabanayo:

- Soo aruurso waxyaabaha dib loo isticmaali karo iyo bacaha wax lagu rito.
- Waxyaabahaas waxaa ka mid ah caagadaha la isticmaalay, kartoomada, sanduuqyo, furarka, maryaha duugga ah iyo wax la mid ah.
- Sidoo kale, raadi waxyaabaha dabiiciga ah kuwaas oo loo isticmaali karo dib u qaabayntaada. Tusaale ahaan, waxyaabahaas waxaa ka mid ah dhagxaanta, caleemaha, qolofta dhirta, ulaha iyo xataa ciidda iyo dhoobada.





- Ka fakar waxa aad jeceshahay inaad sameysid. Qalab carruureed baa? Lugo (taayarro) ma u sameynaysaa? Mise waxaad sameyneysaa guri? Darbiyo ma u sameynaysaa? Aad uga feker naqshadda waxa aad rabto inaad sameyso.
- Sawir naqshadda ama qaabka aad rabto inaad wax u sameyso oo diyaari waxaad u baahantahay si aad u sameyso.
- Samee naqshadaada.
- Mar labaad fiiri naqshadaada. Sidee ayaad kusii hormarin kartaa? Maxaad kusii xoojin kartaa? Maxaa ka caawin kara inuu socod sameeyo?



**Da'da:** Dugsi hoose

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad yar

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Naqshadaynta, qalabka, dhismaha

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Hal'abuurka, xallinta mushkiladaha, isku xirka, ku baraarugsanaanta waxa kugu xeeran

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Qof kale weydiiso inuu kaa cawiyo sameynta naqshadda.
- Naqshadda mid fudud ka dhig,dhirta ka samee weel, ama shay wareega ama waxyaabaha lagu ciyaaro ee tirsiga leh.

# Diyaarinta Liiska

**Waxa aad u baahantahay:** Qalin-rasaas ama qalin caadi ah iyo warqad.

## Waxyaabaha la qabanayo:

- Waxaad ka fekertaa waxyaabo aad liis ka diyaarin karto:
  - Heesaha aad jeceshahay
  - Dhirta ka baxda deegaankaaga
  - Waxyaabaha ku farxad galiya
  - Waxyaabaha aad ku fiican tahay.
  - Waxyaabaha aad qoyskaaga la jeceshahay
- Waxaad ka fakartaa waxyaabo aad liiska ka qori karto kuwaas oo aan ahayn waxyaabaha aad jeceshahay ama waxyaabaha aad ku ciyaarto.
- Mid dooro oo liis ka qor
- Liiska ma u qeybin kartaa qeybo yaryar? Tusaale ahaan dhirta deegaankaaga ku taalla waxaa loo qeybin karaa kuwa la cuno iyo kuwa aan la cunin.

**Da'da:** Da' kasta

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad yar

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Koboc luuqadeed, wax qoridda, higaadda

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Hal'abuurka, kala horraysiinta iyo wax isku xijinta.

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**


- Qof kale weydiiso inuu kuu qoro liiska
- Sawir liiska ereyadaada
- Soo aruuri 10 shay oo isku mid ah. Ma dhir baad kasoo wada aruurin? Mise waxyaabaha la xirto? Mise jikada iyo weelka? Qof kale ka codso inuu kuu qoro magacyada alaabahaan oo dhan.

# Sawir khariiradda deegaankaaga

**Waxa aad u baahantahay:** Qalin-rasaas ama qalin caadi ah,warqad, waxyaabaha cuntada lagu daro iyo weelka wax lagu kariyo.

## Waxyaabaha la qabanayo:

- Soo diyaarso dhowr xabo isugu jira qalin caadi iyo qalin-rasaas waliba ay ku jiraan kuwa midabbo leh.
- Si qiyaas ah/male-awaal ah aagga xaafadda ugu lugee. Maxaad ku aragtaa? (Guryo, dhismayaal,waddooyin iyo sidoo kale geedo ama waxyaabo kale sida masaajiddo, malcamado ama meelo lagu ciyaaro.)
- Waxaad ka fakartaa dhererka waddooyinka qaar intuu le'egahay, dhirta dhererkeeda ama dhismyaasha dhererkooda. Ka waran dhul fidsan ma leedahay meeshu sida meelo dhir ka baxdo ama banaanno ah? Suuq ma jiraa? dugsi se? waxyaabo kale oo niyadaada kusoo dhacay ma jiraan?




- Go'aan ka gaar qaabka aad u sawiri lahayd khariiradaada. Midab ma u sameyaysaa waxyaabaha kala duwan ay ka kooban tahay? Dhammaan ma sawiraysaa? Ma u sameynaysaa calaamado u taagan waxyaabo kale (sida xarriiq laalaaban oo meel biyo maraan u taagan ama meel cagaaran oo dhir u taagan?
- Warqad intee le'eg baad u baahantahay? Hal warqad? Mise labo?

- Intee baad le'ekaysiineysaa waxyaabaha aad sawirayso, ma weynaynaysaa mise waad yaryaraynaysaa? Cabbir ahaan intee baad le'ekaysiinaysaa dugsiyada, meelaha lagu ciyaaro, waddooyinka iyo suuqa?

- Sawir khariiradda. Ku qor magacyada goobaha kala duwan, una samee calaamadaha muhiimka ah.

**Waxqabad dheeraad ah:**

- **Bal qiyaas:** qof ku cusub deegaanka ayaa ku weydiiyey meesha uu ku yaallo suuqa ama webiga. U qor ama u sheeg dhinaca uu ka jiro. Raadi qof kula eega khariiraddaada oo su'aalo ka weydii tilmaanta goobta aad rabto.

- **Qor ama ka sheekee sheeko** ku saabsan meelo gaar ah oo deegaanka ka mid ah. Goormaa dugsiga la furay? Ma lahaa dugsigu meelo bannaan oo lagu ciyaaro? Ma jireen waxyaabo dhibaatooyin ah oo deegaanka ka dhacay sida fatahaado ama dabaylo xooggan? Taariikh kale oo muhiim ah ma jirtaa? Ma jiraan sheekooyin cajiib ah oo deegaanka ka dhacday?

- **Samee qaabka uu deegaanku** noqonayo. Adeegso wixii aad heli karto sida sanduuqyo yaryar ama bacaha la isticmaalay. Ma u sameyn kartaa oo maku habboon yahay qof aan wax arki karin? Haddii aad xarig isticmaasho way ka sii fiicnaan lahayd.

**Da'da:** Da' kasta

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad yar/ mid dhexe

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Koboc luuqadeed, ereyada jihooyinka, magacyada goobaha, muuqaallada dhulka ee muhiimka ah.

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Hal'abuurka, iskuxirka, sawiraadda cabbirka

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Sharrax deegaanka qof kale na weydiiso inuu kaa caawiyo sawirrada.
- Samee naqshadda deegaanka (halkii aad khariirad sameyn lahayd)
- Samee qaabka gurigiinna ama qol ka mid ah guriga.
- Ka sheekee xogta deegaanka aad ku nooshahay, oo qof kale ka codso inuu kuu qoro

# Sigisaanta/Sharabaad ka samee boonbale

**Waxa aad u baahantahay:** Sigisaan dhaadheer, nadiif ah oo la isticmaalay, qalin ballaaran ama jeesto, galuusyo (badhammo), cirbad, dun, maqas, iyo suuf.

## Waxyaabaha la qabanayo:

- Soo qaado sigisaan nadiif ah oo la isticmaalay]. Gacanta gali sigisaanta ka dib na faraha iyo suulka u soo laab qaabka xarafka "C'. suulka gali qeybta ciribta ee sigisaanta. Suulka dhaqdhaqaaji oo ku wad ilaa qaab madax iyo af kuula ekaado.

- Ku calaamadeey qalin ama jeesto meesha madaxa noqon doonta. Iska siib sigisaanta marka. Laba indhood ku sawir meesha aad indhaha u calaamadisay ama galuusyo ku dhaji.

- Ku dhaji xoogaa suuf ah si aad timo ugu sameyso. Si taas aad u sameyso, xoogaa suuf ah oo isle'eg soo gooso kuna qabo meesha dhexda ah. Ka dib ku dhaji sigisaanta, indhaha dushooda.

- Qurxi boombalahaaga sigsaanta ah. Koofiyad yar u samee ama marada wax af u eg uga samee.

- Magac u bixi boombalahaaga oo sidii inuu hadlayo oo kale ula sheekayso. Ka dhig hadba mid faraxsan ama murugaysan adigoo farta dhaqaajinaya. Ka dhig mid wax la yaab leh arkay adigoo indhaha kala fogaynaya ama mid xanaaqsan adigoo indhaha isugu dhajinaya.

## Waxqabad dheeri ah:

- Boombale kale samee oo ka dhig labadoodu inay 'Sheekaysanayaan'. Waa sidee dabeecadahooda? Maxay la yaab leh oo ay leeyihiin? U qabo qoyskaaga bandhig boombalaha sigisaanta.



**Da'da:** Dugsi hoose

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad dhexe

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Koboc luuqadeed, sawiraadda, wada sheekaysiga

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Hal'abuurka, iskuxirka, hormarinta

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Qof kale weydiiso inuu kaa caawiyo sharraxaadda/qurxinta boombalaha.

# Gariir ama shax xisaabeed la mid ah

**Waxa aad u baahantahay:** Dhagxaan, digir ama iniinyo kale.

## Waxyaabaha la qabanayo:

- Ciyaar xisaabeedkee taqaanaa oo dalkeennna laga isticmaalaa? Ma jirtaa wax ciyaar ah (shax ah) oo aad ku ciyaartaan dhagxaan yaryar, digirta qallalan, ama iniinyaha kale iyo wixii la mid ah taas oo shax lagu ciyaaro leh (Sida sawirka hoose ka muuqata oo kale).
- Sidee u ciyaartaa ciyaartan? Ma taqaannaa shuruucdeeda? Haddii aadan aqoon, ma heli kartaa qof kale oo ku bara?
- Haddii aadan haysan shaxdii (xaashida lagu ciyaaro), dhulka maku sameysan kartaa shaxda? Godad yaryar baad dhulka ka sameynaysaa waxaadna ku ridaysaa dhagxaan yaryar si aad ugu ciyaarto.
- Ciyaarta bilow. Haddii aad u baahantahay qof kula ciyaara, waxaad u yeeran kartaa qof kale. Ciyaartan (shaxdaan) maxaa xiiso u yeelaya?
- Ciyaartaan waxay u dhowdahay ciyaarta giriirka ee carruurta Soomaalidu dheesho ama ciyaarto.





**Waxqabad dheeraad ah:**

- Ma qori kartaa qaabka loo ciyaaro ciyaartan? Tusaale ahaan qof aan waligiis ciyaarin baad tilmaamaha (sida uu u ciyaarayo) u qoraysaa.

- Ma sameyn kartaa ciyaar xisaabeed kale? Qof kale bar sida loo ciyaaro ciyaartaas. Maxay yihiin shuruucda ciyaarta?

**Da'da:** Da' kasta

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad yar

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Koboc luuqadeed iyo tirinta xisaabta

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Wadashaqeynta, xallinta mushkiladaha, xiriirka, khidadaha (istiraatijiyad)

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Haddii ay kugu adagtahay walxaha yaryar inaad soo qabatid, kuwa waaweyn isticmaal.

# Daawashada Deegaanka Dabiiciga ah

**Waxa aad u baahantahay:** Pencil or pen and paper

## Waxyaabaha la qabanayo:

- Magaalada bannaankeeda aad oo ka soo fikir waxyaabaha aad jeceshahay inaad daawatid. Waxyaabaha waxay noqon karaan cayayaan sida caaro-caaro guri dhisanaysa ama quraanyo afka cunto ku sidata. Waxay noqon karaan waxyaabaha duula sida balanbaalis, shimbir ama shinni ubax uruursanaysa. Ama waxaad daawan kartaa dhirta iyo hooska dabaylaha ama biyaha qulqulaya.

- Ugu yaraan 15 daqiiqo ama ka badan si xiriir ah u daawo shayga aad rabto inaad daawato oo wax ka qor intii aad ka awoodid. Si fiican u fiiri siday u soconayaan ama dhaqdhaqaaq u sameynayaan. Isticmaal calaamado gaar ah ama midab (midab dhalaalaya ama midab kuu sahlaya in sawirku si fiican u soo baxo). Ma sharrixi kartaa?

- Su'aalo kale is weydii. Ilaa intee le'egyahay? Intee lugood buu leeyahay? Sidee buu u socdaa? (Ma dheereeyaa, ma aayar buu u socdaa, ma si awood leh buu u socdaa mise si tabaryari ah). Xaggee buu u socdaa? Muxuu rabaa inuu sameeyo? Ma jiraan xayawaanno ama cayayaano kale oo u dhow? Maxay sameynayaan?





**Waxqabad dheeraad ah:**

- **Sawir ka samee** waxa aad soo aragtay

- **Soo ogow** xog badan oo ku saabsan waxa aad soo aragtay. Ka warayso qof wax ka garanaya waxa aad soo aragtay oo su'aalo ka weydii. Muxuu cunaa xayawaankaas ama cayayaankasi? Intee nooc buu ka kooban yahay? Sidee buu cuntada ku helaa? Ma koox-koox bay u noolyihiin mise si kelinimo ah? Sidee bay u tarmaan? Ma guuraan oo deegaano kale ma u guuraan?

- **Sameyso buug xusuus qor oo aad ku qorto waxyaabaha dabiiciga ah.** Wuxuu noqon karaa warqado aad ku qorto ama ku sawirto maalin kasta waxa aad aragto. Si aad u ogaato isbeddelka dhacamaalmo kala duwan, Tusaale, u fiirso hooska dhirtu sameynayso,ubaxyada dillaacaya ama biyaha qulqulaya. Ma jiraan cayayaanno kala duwan oo ubaxa dul saaran? Ka warran dhirtu sida ay noqotay? Caleemahoodu ma is beddelayaan ama shimbiro ma dulsaaran yihiin? Dhirtu ma koraysaa? Ka waran biyaha qulqulaya? Wax kalluun ah ama cayayaanno kale maku jiraan biyaha? Midabka biyahu ma isbeddeleen?



**Da'da:** Da' kasta

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad yar

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Koboc luuqadeed, sharraxaadda, Sayniska: Waxyaabaha dabiiciga iyo waxyaabaha nool (biyolooji)

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Inaad si qotodheer wax u qiimeso, inaad wax ka baratid waxyaabaha aad indho-indhaynaysid,Dulqaadka, fekerka qotoda dheer iyoxiriirka

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Haddii uu araggu kugu adagyahay adeegso dareemayaashaada kale sida taabashada, dhageysiga ama urka adeegso si aad wax uga ogaato dhirta, geedaha iyo bey'ada dabiiciga ah ee kugu xeeran.
- Sharrax waxyaabaha aad urisay, ama dareentay ama aad maqashay. Qof kale u sharrax si uu kuuguu qoro.
- Sawir intii aad qori lahayd ama qof kale weydiiso inuu kuu qoro fikradaha.

# Hees Cusub, cod hore

**Waxa aad u baahantahay:** Waxba uma baahnid

## Waxyaabaha la qabanayo:

- Ka feker hees luuqadaada ah taas oo qof walba garanayo si fududna loo qaadi karo.
- Curi ereyo cusub oo ugu luuqee sida heestaas loo qaado. Wax kasta oo aad jeceshahay baad hees ka sameyn kartaa. Tusaale ahaan, sida aad u cadayatid, macallinka aad jeceshahay ama wax shactiro (qosol ah) oo aad maqashay.
- Dadka kale heesta bar. Xoogaa jilitaan ah ku dar haddii aad jeceshahay.
- Tusaale ahaan halkaan waxaa ku qoran hees howleed gacmo dhaqasho ah taas oo loo qaado sida heesta caanka ah ee "Soomaaliyeey Toosoo" Ma u qaadi kartaa heestan sida heesta 'Soomaaliyeey Toosoo'?
  Gacmahaaga Soo dhaqo oo
  Jeermiskana ka baabi'yoo
  Saabbuun kusoo dhaqo oo
  Biyahana ha gees marinoo
  Waligaa ha goyn nadaafadda.

**Da'da:** Da' kasta

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad yar

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Koboc luuqadeed, jiibta (codka heesaha), dhawaaqa ereyada heesta

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Hal'abuurka, xiriirka

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Haddii aad qof dhagool ah tahay ama maqalku kugu adagyahay, waxaad adeegsan kartaa luuqadda tilmaanta ee dhagoollada ama jilitaan baad sameyn kartaa.
- Waxaad heesta ku duubi kartaa raadiye si aad u sameyso codad kala duwan.
- Waxaad garaaci kartaa (tumi kartaa) jirgaammo ama caagag iyadoo qof kale kuu heesayo.

# Gabey Jacbur ah

**Waxa aad u baahantahay:** Qalin-rasaas ama qalin caadi ah iyo warqad

## Waxyaabaha la qabanayo:

- Eeg gabaygaan jacburka ah oo si fiican ula soco erayada. Si deggan u akhri oo waliba ku luuqee ama cod sare ku akhri haddii aad awooddo. Jacbuurkaan tuducyadiisu waxaa ay qaar u dhowyihiin ama la mid yihiin jacbur uu abwaan **Dhoodaan** horey u tiriyey.

Sidii arday banooni dheelaysoo
Goolal laga dhaliyey,
AMA guri albaab aan lahayn
Oo digaag lagu xareeye
AMA inan iskool loo diroo
Xaflad kale aadday,
AMA bariis canjeelo laga dhigoo
Shaahna laga buuxshay,
AMA Qare la shiilay oo subag lagu macaaneeyey
AMA marti wan weyn loo qaloo
Rooti loo kariyey
QOSOL iyo MADADAALO kaan rabaan gabay ku sheegaaye

- Marka aad akhriska dhammeyso, qor dhammaan ereyada jacburka ah ee ku jira gabayga

- Ereyadee ama tuducdee baad ka heshay gabaygaan jacburka ah? Maxay se tahay sababtu?

- Ma taqaannaa gabayo kale oo Afsoomaali ah oo jacbur ah?

- Adigoo isticmaalaya ereyadaada, qor gabay yar oo jacbur ah ama sheeko yar. Waad ka maarmi kartaa ereyada gabayga hore. Kuwa aad ka hesho oo cod fiican sameynaya ayaad dooran kartaa. Ka dhig jacburka mid lagu qoslo (xaraabo ah).

- Waxaad tusaale ahaan u adeegsan kartaa gabay jacburka kor ku qoran. Iskuday inaad tuducyadaada ku bilowdo erey kooban sida AMA . . ..










**Da'da:** 8 sano jir iyo ka weyn

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad yar

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Koboc luuqadeed, qeexitaanka, qaab dhismeedka jumlada, ereyada (Miraha heesaha) iyo codka.

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Hal'abuurka, xiriirka, micno sameynta.

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Gabayga akhri ama qof ka codso inuu kuu qoro.
- Qor laba tuduc (Line) oo gabay ah.

# Abuur iniin una fiirso sida ay u korayso

**Waxa aad u baahantahay:** Iniin, ciid, biyo, calaamadiye.

## Waxyaabaha la qabanayo:

- Dooro waxa aad jeceshahay inaad beerto. Digir, misir,  mise iniin kale? Wax la cuno miyaad rabtaa inaad beerto? Raadi iniinyaha ku habboon iyo waliba kuwa si fiican ugu baxaya deegaanka iyo xilliga aad joogtid.

- Go'aan ka gaar meesha aad ku beerayso. Ma dhulka baad ku beeraysaa mise caag ama weel baad ku dhex abuureysaa? Haddii aad dhulka ku beerayso, raadso meel aan xayawaanaka dheer oo aan dhib u keenayn. Raadi meesha ugu fiican ee lagu beeri karo. Ka warran meelkor ka dadan/daboolan oo hoos leh amaaan toos ugu dhacyn iftiinka qorraxdu?

- Geedka ku beer meel aan dhir hoosaad aan lahayn. Iniinyaha labo ama saddex halkii meel ku wada abuur si haddii mid bixi waydo (biqli waydo) kuwa kale u baxaan. Biyo ku shub oo si fiican u waraabi.

- Calaamadi geedka. Geedka magaciisa ul ama qod yar ku qor oo dhexgali ciidda iniinta meel u dhow si geedka magaciisa aadan u illaawin.

- Maalinkasta waraabi geedka oo ku dadaal inuu markasta qoyanaado.

### Waxqabad dheeraad ah:

- Maalin walba eeg koritaanka geedka. Mar kasta meel ku qor isbeddelka koritaankiisa. Marka ay iniintu soo baxdo, maalin kasta cabbir dhererkeeda. Ilaa immisa maalmood bay caleen kusoo saartay? Ubax? Iyo miro? Qor waxa aad ka ogaato.



**Da'da:** Da' kasta

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad yar

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Beeridda dhirta, ilaalinta dhirta, deegaanka dabiiciga ah

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Indha-indhayn, xallinta mushkiladaha

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Haddii socodku kugu adagyahay, waxaad iniinta ku beeri kartaa baaldi ama caag dhexdiisa. Biyaha masoo gaarsiin kartaa iniinta? Iftiin ku filan ma helaysaaheshaa?
- Caagadaha shablaanta ah baad afka ka jari kartaa si aad wax ugu dhex beerto.

# Wax wada Akhrin (Akhrin - wadareed)

**Waxa aad u baahantahay:** Buug sheeko ah ama akhri sheekooyinka ku yaalla bogga ku xiga.

## Waxyaabaha la qabanayo:

- Walaalka weyn ama qofka weyn wuxuu u akhrin karaa sheeko ilmaha yar ama si la mid ah ilmaha isna wuu u akhrin karaa walaalaha ka weyn ama qof kale oo weyn. Waxaa sidoo kale fiican in mid ba mar akhriyo oo ay wada akhriyaan.
- Sheeko dooro (waliba sheeko buug ku qoran ) taas oo la wada akhrin karo ama sheeko cusub sameeya. Sheekadu waxay noqon kartaa sheeko xaqiiqo ah ama sheeko aan jirin.
- Niyadda ku hay inaad codkaaga beddeshid marka aad sheekada akhrinayso. Sidee baad ku sameyn kartaa codka libaaxa, ama cod qof waayeel ah ama cod bakayle cabsanaya.
- Mararka qaar sheekada jooji oo weydii qofka kale 'Maxaad u malaynaysaa inay ku xigi doonto?'. Isku daya inaad ka wada fakartaan qeybta xigta ee sheekada iyo waxa imaan doona.
- Bogga soo socda waxaa ku yaalla labo sheeko oo gaagaaban kuwaas oo aad isla akhrin kartaan. Sidoo kale waxaad akhrin kartaa sheekadii 'Dhurwaaga iyo Bakaylaha' ee aan kusoo aragnay waxqabadkii "Sawir Xayawaan cajiib ah". Inta badan akhriya qeybta hore ee sheekada, ka dib joojiya inta aysan dhammaan sheekadu oo ka fakara sida ay ku dhammaan dooonto.
- Hadda akhriya dhammaadka. Sidaad u malaynayseen ma noqotay? Sidoo kale sheekada cinwaan ma u sameyn kartaan?

### Waxqabad dheeraad ah:

- Ma isla jili kartaan mid ka mid ah sheekooyinka aad ugu jeceshihiin? Ka fakar qeybta aad jilayso oo si fiican u samee oo u barbaro. U soo bandhig sheekada qoyska intiisa kale.

**Sheekada 1aad: Maroodi iyo ilmihiisa.**

"Ha aadin Wabiga maroodi hooyo ah ayaa ilmaheeda yar ku dhihi jirtay sidaas. 'Waxaa wabiga jooga yaxaas weyn oo ku cunaya haddii aad tagto'. Ilmaha yari aad buu u xiisaynayey wabiga. Wuxuu dhihi jiray, muxuu yahay yaxaas? Marna horay uma uusan arag yaxaas. Sidaa darteed, wuxuu aaday wabigii. Meel wabiga qarkiisa ah ayuu istaagay. Si tartiib ah ayuu biyaha ugu soo dhowaanayey. Wuxuu socdaba wuxuu iska dhex arkay biyihii markaas ayuu aad ugu soo dhowaaday biyaha, nasiibdarro yaxaas ilko waaweyn leh ayaa hal mar biyihii kasoo dhex muuqday waliba si degdeg ah! Hal mar ayuu sanka ku dhagay maroodigii yaraa.. 'I Caawiya' ayuu ku qeyliyey. Hooyadii baa soo orodday, waxay na ku dhagtay saynta (dabada). Sidoo kale waxaa soo orday walaalihii oo dhagaha qabtay si ay yaxaaska uga fujiyaan. Si xoog leh ayey u jiideen balse yaxaaskii ma sii dayn. 'I caawiya' ayuu ku qeylinayaa, cid kasta oo kaynta joogtay way kusoo baxeen qeylada, wayna isla jiideen si yaxaaska looga fujiyo.

**Ugu dambeyn:**

Waxay jiideen saynta ilaa ay dheeraatay oo xarig oo kale noqotay. Sidoo kale dhagihii waa iska ballaarteen maadaama la jiidayey, sankiisiina wuu sii dheeraaday maadaama yaxaasku ku dhaganaa. Waa la jiiday oo la jiiday, nasiib wanaag ugu dambayn yaxaaskii wuu sii daayey, intii kale na halmar ayey dhulka ku dhaceen. Ilmihii wuu badbaaday. Laakiinse ma ogtahay waxa ku dhacay sayntiisii dhuubnayd ,dhagihiisii yaryaraa, iyo sidoo kale .... SANKIISII? Waa sababta ilaa maanta maroodigu u leeyahay san dheer oo la dhaho fool iyo dhago dhaadheer oo caleenta kaabashka u eg.

**Sheekada 2aad: Saddexdii Dhibcood ee Roobka ahaa (waxaa qoray Terry Jones).**

Dhibco roob ah ayaa daruur kasoo da'ay. Dhibicdii ugu horreysey oo ka mid ah dhibcihii ayaa middii ku xigtay ku tiri "Waxaan ahay dhibicda ugu fiican uguna weyn dhibcaha roobka ee cirka ka yimaada!"

'Runtii dhibic fiican waad tahay', dhibicdii ku xigtay ayaa ku jawaab celisay waxayna tiri iyadoo hadalkii sii wadata, 'Laakiinse uma qurxoonid sida muuqaalkayga oo kale. Ani waxay ila tahay in muuqaalku yahay waxa ugu muhiimsan, sidaa darteed aniga ayaa ah dhibicda ugu fiican ee cirka ka timaadda.'

Dhibicdii koowaad ayaa markale tiri 'Waayahay waan arki doonnaa'. Sidaa darteed waxay arrintii u bandhigeen dhibicdii saddexaad si ay u kala saarto. Laakiinse dhibicdii saddexaad waxay ku jawaabtay: 'Wax aan micno lahayn ayaad sheegaysaan! Waa macquul inaad weyntihiin oo wali muuqaal fiican leedihiin laakiinse sida qof kasta ogyahay, waxa ugu muhiimsan waa in dhibicda biyaha nadiif tahay, sidaa darteed anigu waan idinka nadiifsanahay oo aniga ayaa ah dhibicda ugu fiican ee cirka kasoo dhacda!'

**Ugu dambeyn:**

Marka ay sidaas tiri, inta aysan saddexdii dhibcood midna jawaabin, ayey dhulka soo gaareen oo ku dhaceen, isla markiina saddexdiiba waxay ka mid noqdeen dhooqada dhulka taalla.

**Da'da:** Da' kasta

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad sare

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Koboc luuqadeed, qaabka sheekada, sheeko, qiyaasid/saadaalin.

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Hal'abuurka, wadashaqeynta, dhagaysiga, shaqo kooxeedka.

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Luuqadda dhagoolada ayaad sheekada ku sheegi kartaa. Xusuusnow inaad ku dadaashid inaad wajiga wax ka cabbirtid.
- Iskuday inaad sheekada jisho adigoo adeegsanaya boombalaha sigisaanta ah.

# Baadi-goob (raadin)

**Waxa aad u baahantahay:** Warqad iyo qalin

## Waxyaabaha la qabanayo:

- Baadi-goobku waa marka aad meel aaddid si aad usoo hesho waxyaalo aad raadinayso. Waxaad wax ka raadin kartaa gudaha iyo bannaanka ba. Haddii aad koox tihiin oo wax wada raadinaysaan, qofka ugu horreeya ee hela shayga la raadinayey ayaa guulaysanaya.

- Liiskaan eeg. Adigoo kaligaa ah ama idinkoo koox ah, ilaa waqti intee le'eg baad kusoo heli kartaan waxyaabahaan hoos ku qoran?

  - Shay buluug ah
  - Shay jilicsan
  - Laba shay oo alwaax ka sameysan
  - Shay macaan
  - Saddex shay oo isku xaraf ka bilowda
  - Shay ifaya
  - Shay nadiifinta loo isticmaalo

- Haddii aad baadigoob la sameysey qof kale, isbarbar dhiga waxyaabaha aad soo hesheen.

- Hadda liis/taxane aad leedahay samee. Wey fiicantahay inaad ku darto tilmaamaha sida jileec, macaan, ifaya iyo midabbada. Fiiri tusaalaha kore adigoo ka raacaya tusaalahan, iskuday inaad sameyso 10 shay oo kale oo la raadinayo.

- Qor liiska/taxanaha oo u dir qof kalesi uu u raadiyo alaabtaas una soo helo.



**Da’da:** Da’ kasta

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad yar

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Koboc luuqadeed (tilmaamaha iyo magacyada). Wax tirinta.

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Hal’abuurka, wadashaqeynta, xallinta mushkiladaha.

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Waxyaabaha qolkaaga dhexyaalla kaliya dooro.
- Waxyaabahaas tilmaan oo weydiiso qof kale inuu kusoo qabto.
- U yeeri (qof kale) waxyaabaha aad rabtid in laguu qoro.
- Haddii araggu kugu adagyahay, waxaad raadsataa qof kale oo alaabaha kusoo aruuriya si aad mar labaad u raadiso, qolka gudahiisana ku qari. Ma labo barkimood baa? Laba buug baa? Labo kabood baa?

# Lambar sireed


**Waxa aad u baahantahay:** Warqad iyo qalin-rasaas ama qalin caadi ah

## Waxyaabaha la qabanayo:

Waxaa jira siyaabo badan oo loo sameeyo lambar sireed qoraal ah oo adigu leedahay.

- Waxaad xarfaha Alifbeetada ku beddeli kartaa lambarro laakiinse waa inaad kasoo bilowdaa lambarka ugu sarreeya oo gadaal usoo waddaa. Tusaale ahaan, luuqadda Ingiriiska waxay ka kooban tahay 26 xaraf sidaas darteed waxay noqoneysaa sidaan: a=26, b=25, c=24, d=23 iwm. Ma sheegi kartaa lambarradaan ereyaday ay u taaganyihiin? 8 22 24 9 22 7 24 12 23 22

- Waxaad kaloo sameyn kartaa xarfaha Alifbeetada ku beddesho xarfo kale adigoo ka taxadaraya kala horraynta xarfaha. Tusaale ahaan, a=h, b=i, c=j, d=k, e=l, f=m iwm.




- Waxaad kale oo aad sameyn kartaa calaamado cusub oo u taagan xarfaha luuqadda sida aad ku arkayso tusaalaha kore. Haddii aad go'aansatid inaad sameysato calaamado aad adigu leedahay, waxaad is weydiisaa:

  - Lambar sireedkayga ma sii jiif jiif ah baan u qorayaa mise si dherer ah mise bidix ilaa midig?

  - Ma helayaa calaamado igu filan oo le'eg inta xaraf ee luuqaddu ka kooban tahay? Ama calaamado dhowr ah oo u taagan hal xaraf? (tani waxay adkaynaysaa lambar sireedkaaga oo way adagtahay in la jabiyo).

- Maka shaqayn kartaa ereyadaan hoose Ingiriis ahaan adigoo adeegsanaya calaamadaha bogga hore lagugu siiyey? (Xusuusnoow, ma wada haysatid dhammaan lambar sireedka).



- Soo diyaarso qalin iyo warqad. Qor lambar sireedkaaga oo dhammeystiran. Ka dib qor sheeko ku qoran lambar sireedkaaga oo tijaabi in dadka kale fahmi karaan.

**Da'da:** Da' kasta

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad yar

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Koboc luuqadeed, qoraalka, higgaadda

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Hal'abuurka, xiriirka, xallinta mushkiladaha.

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Haddii araggu kugu adagyahay, waxaad sameyn kartaa lambar sireed hadal ah/ cod ah. Dooro codka sida 'ka' 'ub' ama 'sha'. Erey kasta ka hormari codkaan, ama shibbane kasta. Tusaale ahaan, haddii aad leedahay 'I am very happy' Ingiriis ahaan, waxaad ugu dhawaaqi kartaa sidaan "Kai Kam kahap kapy".

# Muuqaalada iyo qaababka waxyaabaha dabiiciga ah ee deegaanka

**Waxa aad u baahantahay:** Dhagxaan iyo ulo.

## Waxyaabaha la qabanayo:

- Bannaanka u bax. Intee muuqaal iyo qaabab kala duwan baad ku aragtaa dhulka caadiga ah? Sidoo kale bal fiiri waxyaabaha laga keeno bey'adda dabiiciga ah ee gurigiinna yaalla sida miraha iyo khudaarta.




- Intee qaab iyo muuqaal oo kala duwan baad sheegi kartaa? Ma heli kartaa waxyaabahan:

  - Qaab siman oo isle'eg leh?
  - Qaab daliigo is dhaafsan leh?
  - Goobo ah ama wareeg ah?
  - Waxyaabo qaabka ay sameysan yihiin aysan isbeddelin?
  - Qaab xiddig ama qaabka wadnaha leh?

- Ma heli kartaa caleemo u eg geed la guntay (la xiray)? Caleemo qaabkaas ah ma arki kartaa? Ma tirin kartaa inta qeybood ay usii qeybsanto caleentaas?

- Soo aruurso xooggaa dhagxaan iyo ulo ah. Qaabab kale maka sameyn kartaa waxyaabahaas? Ma sameyn kartaa:
  - Saddex-xagal ama wareeg
  - Shan geesle (Qaab 5 dhinac leh)
  - Lix Geesleh (qaab 6 dhinac leh)
  - Siddeed geesle (qaab 8 dhinac leh)



- Ma ka sameyn kartaa dhagxaanta iyo ulaha walax leh qaab 3 dhinac ah? Tusaale ahaan ahraam (Pyramid) ama sanduuq?

**Da'da:** Da' kasta

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad yar

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Magacyada qaababka, ereyada lagu qeexo muuqaallada, tirinta

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Hal'abuurka, Iskuxirka, xallinta mushkiladaha, Indha-indhaynta.

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Haddii aadan haysan bannaan gurigiina u dhow, ma aadi kartaa dariskiinna ?
- Haddii aadan socon karin, ma heli kartaa qof kuu keena saxan ay ku jiraan walxo si aad waxqabadka ugu sameysid.

# Sheeko meerto ah

**Waxa aad u baahantahay:** Qalin rasaas ama qalin caadi ah iyo warqad

## Waxyaabaha la qabanayo:

Waxqabadkaan waxaad la sameynaysaa saddex qof ama ka badan. Si wareeg ah iskula fariista.

- Qof ha bilaabo sheeko cusub, tusaale ahaan, **"Waxaa jirtay gabar yar oo aan seexan jirin. Way ciyaartaa oo jiifsataa balse hurdo kama timaado"**.
- Halkaas ku jooji. Qofka ku xiga u gudbi si uu sheekada usii wado labo ama saddex jumlo/weedhood, tusaale ahaan:

  **"Waxay daawan jirtay wareegga dayaxa ee weyn. Si degdeg ah, waxay aragtay shay dayaxa kasoo dhacay oo kusoo socda iyada. Waxay ahayd xiddig dhalaalaysa taas oo hoos soo aadday, way soo socotay oo socotay ilaa ay daaqadeeda ag timid"**
- 'U gudbi' sheekada qofka ku xiga si ay u sii socoto. Ilaa intee baad sheekada wadi kartaan? Haddii laba qof kaliya aad tihiin, adinku kusoo celiya.
- Soo gabagabeeya sheekada markii qof walba ugu yaraan ay labo jeer soo marto.
- Xeerka 'Sheeko gudbintu' waa:
  - Adeegso male-awaalkaaga iyo sida ay kula tahay, sheeko kasta waad abuuran kartaa.
  - Markasta sheekada xiiso u yeela oo horay u sii wada (Ha dhihin, 'Jaranjarada ayay ku socotay' oo ha joojin, ee waxaad dhahdaa 'Jaranjarada ayey ku socotay ilaa ay gaartay meesha u sarraysa waxayna aragtay ……')
  - Sheekada ha wada sheegin ee markasta qofka ku xiga u oggolow inuu sii wado.

- Sheekadii aad rabto ayaad dooran kartaa. Waxay noqon kartaa sheeko xaqiiqo ah (sida sheekooyinka Safarrada ama farxadda) ama waxay noqon kartaa xawayaan ama sheeko khiyaali ah oo aad iska male-awaaashay.




**Da'da:** Dugsi hoose

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad yar

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Koboc luuqadeed, qaabka sheekada, iyo shuruucda sheekada: Waxa aad sameyn karto iyo waxa aadan sameyn karin marka aad sheekada bilowdo.

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Inaad si dhaqso ah u fakarto, hal'abuurka, xiriirka, iyo wadashaqeynta.

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Ku rid boorso 10 waxyaabood oo yaryar oo aad guriga ka heli karto-waxkasta oo aad hesho, (Tusaale ahaa, koob, dhagax, ciid ama maro yar). Hal shay boorsada kasoo bixi, markasta oo aad shay soo bxisana isticmaal shaygaas si aad hal ama labo jumlo sheekada ugu darto. Tusaale ahaa, 'Jaranjarada afkeeda sare waxay ku aragtay koob, waliba koob dahab ah oo ay ka buuxdo dahab dareere ah oo cajiib ah.
- Qor sheekada ugu fiican aad isla sameyn kartaan. Ku dara sheekada tilmaamo iyo sharraxaad si aad xiiso ugu yeesho.

# U Mahadceli halyeyga bulshada

**Waxa aad u baahantahay:** Qalin rasaas iyo warqad

## Waxyaabaha la qabanayo:



- Halyeyga bulshada wuxuu noqon karaa qof caadi ah kaas lagu bartay caawinta dadka ama wuxuu noqon karaa qof kasoo guulaystay caqabado badan oo soo wajahay. Qof kasta ayaa xiddig (halyey/Halyeyad) noqon kara. Ma taqaanaa qof noocaan ah?

- Waxaad ka fakartaa halyeeyada bulshadaada. Maxay yihiin? Maxay qabteen? Maxaad u jeclaatay?

- Sidee baad jeceshahay inaad ugu mahadceliso halyeegaaga/Halyeyadaada? Sawir, mise suugaan aad ku cabirayso guulihiisa/guuleheeda ayaad jecelaan lahayd inaad ugu mahadceliso? Ma warqad mahadcelin ah mise waxyaabo kale oo hadiyad ah? Mise waxaad rabtaa kaliya inaad dhahdo 'Waad Mahadsantahay"

- Diyaari hadiyadda ama warqadda oo raadi sida ugu fiican aad u gaarsiin karto halyeygaaga/Halyeyadaada. Walaalahaa kaa weyn ama qof kale weydii inuu arintaan kaa taageero ama kaa caawiyo.

**Da'da:** Dugsi hoose

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad yar

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Koboc luuqadeed

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Xiriirka, hal'abuurka barashada naxariista iyo wanaagga.

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Qof kale u yeeri warqadda si uu kuugu qoro. Sawir u samee aad u gayso ama hadiyad ku dar.

# Xasayn/Qarin

**Waxa aad u baahantahay:** Qalin rasaas ama qalin caadi ah iyo warqad

## Waxyaabaha la qabanayo:

Xasayntu ama qarintu waa ciyaar taas oo dadka ciyaaraya ay raadinayaan waxyaabo la qariyey iyagoo raacaya **tilmaan-bixiyaal**..Qaab kasta oo aad sameyso wuxuu kuu horseedayaa tilmaamaha ku xiga ilaa aad ka hesho shaygii la raadinayey. Walaxda ugu dambeysa ee la goobayo waxay noqon kartaa shay kasta—waxyaabo yaryar oo xiiso lehama waxyaabo la cuno.Hubi waxyaabaha la qariyey inaan xayawaan kale helin.

- Waxaad ka fekertaa **qofka aad jeclaan lahayd inuu** soo helo waxa aad qarisay—walaalka/walaashaa kaa weyn mise kan kaa yar? Mise qof waalid ah? Waxaad u baahantahay inaad u qorto tilmaamo ku habboon oo qofkaasifahmi karo (eeg tusaalooyinka hoose).

- Waxaad ka fekertaa **meesha aad rabto inaad** wax ku xasayso —Bannaanka mise gudaha mise labada ba? Xaggee bay ka bilaabanaysaa xaggeese ku dhammaanaysaa?

- **Dooro goobta** (meel tilmaanta la dhigo karo. Geed weyn, mise armaajada guriga taalla baad dhexgalin mise qof qoyska ka mid ah oo aan ciyaarta ku jirin baad u dhiibaysaa? Ilaa 8 meelood baa kugu filan. Meelkasta qor oo lambar u yeel siday u kala horreeyaan.

- **Ku qor warqad gaar ah tilmaan kasta.** Ku dadaal inaad tilmaamaha ka dhigtid kuwa dadka ciyaaraya fahmi karaan, wax aad u fudud na ha ka dhigin! Tusaale ahaan:
  - Tilmaan: **Waxaan haystaa liin macaan, miro isku dheggan** (goobta: Geedka cambaha)
  - Tilmaan: **Waa meesha aad habeenkii ku riyooto** (Goobta: Sariir)

Sidoo kale waxaad isticmaali kartaa xarfo la is dhaafshay (Marka aad xarfaha kala hormariso) laakiin micno sameynaya marka la isku aaddiyo, tusaale ahaan:

- Tilmaam: **Ahanat Hayiba** (Jawaabta: haanta biyaha)
- Ama waxaad isticmaali kartaa xarfo sireedkaaga.

- Lambarro u samee tilmaamaha oo isku laalaab adigo lambarka kaliya muujinaya. Dadka ciyaaraya waxaad siinaysaa tilmaanta koowaad si ay ugu suurtogasho inay helaan tilmaan ba tilmaanta ku xigta.

- Hayso tilmaanta koowaad inta kale na u qari sida ay ugu kala horreeyaan goobaha.—aeegso liiskii hore si aad u xasuusato meelihii aad ku qarisay. Tilmaanta 1-aad waa meesha aad ku qarinayso tilmaanta 2-aad. Tilmaanta 2-aad na waa meesha aad tilmaanta 3-aad ku qarinayso sidaas baad ku wadaysaa. Tilmaanta u dambaysa waa meesha aad ka helayso wixii la qariyey

  - Haddii aad ku ciyaaraysaan hal qof ka badan, marka hore xeerka ciyaarta isla oggolaada. Tusaale ahaan xeerku wuxuu noqon karaa: Waxaa loo baahanyahay in la isa sugo inta aan tilmaanta xigta loo gudbin.
  - Waxaan u baahannahay in qofba mar qaato si aan u helno tilmaanta.
  - Waxaan u baahannahay inaan isla wadaagno agabka la qariyey marka aan helno.

- **Bixi tilmaanta koowaad.** La soco dadka kula ciyaaraya waa intaas oo ay waayaan tilmaantii una baahdaan caawimaad dheeri ah.

**Da'da:** 10 jir iyo ka weyn

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad dhexe

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Koboc luuqadeed, wax qoridda, higgaadda.

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Xiriirka, hal'abuurka, fakarka qotoda dheer, xallinta mushkiladaha, kala horraysiinta iyo isku xijinta.

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- Qof weydiiso inuu kaa caawiyo inuu kuu qoro tilmaamaha.
- Ha u sameyn xasaynta si 'qeexan' laakiinse tilmaan kasta waa inay ahaataa mid booska yar ku tusi karta-waxay kuu sahlaysaa si fudud inaad u sameysid
- Samee tilmaamo yaryar adigo sawiraya

# Labaatan Su'aalood

**Waxa aad u baahantahay:** Waxba looma baahna

## Waxyaabaha la qabanayo:

Waxqabadkaan waxaa fiican inay wada smaeeyaan labo ilaa shan qof si qofkasta uu u helo fursad uu su'aalo ku weydiiyo kuwa kale.

- Qof idinka mid ah ayaad ku bilaabaysaan. Tusaale ahaan, qofka idiinku yar.
- Dooro qof ama goob ama walax. Waxaad ka fakartaa waxyaabo ama qof aad si fiican u taqaaan si aad su'aalaha lagaa weydiiyo inta badan uga jawaabtid. Haddii aad qof dooratid, qofkaasi wuxuu noqon karaa qof nool ama qof dhintay ama qof aan jirin (Qof aad sheeko ku maqashay). Ku dadaal inaad dooratid qof, goob ama walxo qofkasta oo kooxda ka mid ah uu wax ka garanayo.
- Qofna ha u sheegin waxa uu dooranayo. U daa iyaga.
- Kooxda kale waxaad weydiisaa su'aalaha haa ama maya looga jawaabi karo. Ku bilow su'aalaha guud ee jawaabtoodu "Haa" ama "Maya" noqon karto. Tusaale ahaan:
  - "Ma Qof baa?"
  - "Ma meel baa?"
  - "Ma walax baa?"
  - "Ma xaqiiqo baa mise waa khiyaali?"
- Qof ba markiisa ha qaato oo isweydiiya su'aalaha haa ama maya-da ah. Ugu yaraan qofkasta hal su'aal ha weydiiyo kooxda kale. Haddii qof ka mid ah kooxda uu ku keeno su'aal aan looga jawaabi karin"haa" ama "maya", ku celi markale si uu suaasha uga dhigo mid looga jawaabi karo "haa" ama "maya". Tusaae ahaan, qof baa waxa uu keenay su'aal ah "Immisa sano ayey jireen?". waxaad uga dhigi kartaan "miyey ka weynaayeen 50 sano?"

- Marka ay adiga ku marayso su'aalo cayiman weydii. Waxaad ka fakartaa su'aalo cusub oo aan horay loosoo weydiin qofka. Tusaale ahaan, haddii qofka marka hore lasoo weydiiyey baaxadda (Cabbirka), ka gudub su'aashaasoo weydii su'aalo ku saabsan. Midabka ama waxyaabaha ay walaxdo ka sameynsan tahay.

- Su'aalaha wada ilaa aad 20 ka gaareysaan ama qofku uu jawaabta saxda ah bixinayo. Isla tiriya su'aalaha. Haddii kooxdu ay gaarto 20 su'aalood balse aysan wali garan jawaabta saxda ah, u sheeg waxa ay tahay. Haddii la garto iyadoon la gaarin 20 su'aalood, sidaas baa waxqabadku/ciyaartuku dhammaatay.

- Qofka jawaaabta saxay baa ku xigsanaya oo qaadanata suaahsa. Haddii qofna uu san sixin jawaabta, qofkii la doono ayaa ku xigsanaya oo bilaabaya ciyaarta. Qofkasta waa inuu fursad u helaa inuu qeyb ka noqdo ciyaarta si ay xiiso badan u yeelato.

**Da'da:** Da' kasta

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** caawimaad yar

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Koboc luuqadeed, kala qeyb-qeybinta

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Xiriirka, fakarka qotoda dheer, xallinta mushkiladaha

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**


- Ku koob su'aalahaaga qeyb cayiman, tusaale. 'xayawaan', 'cunto', ama 'qof caan ah'. U sheeg kooxda qeybta ay yihiin su'aaluhu.
- Si kooxaysi labo labo ah isugu biira si aad isku caawisaan.
- Su'aalaha ka badiya 20 su'aalood si fursad loogu helo jawaabta saxda ah.
- 10 waxyaabood oo yaryar guriga kasoo aruurso oo saar miiska ama saxan ballaaran. Si qarsoodi ah mid u dooro, oo kooxda weydii waxa aad hayso.

# Warqad aad Macallinkaaga u dirayso

**Waxa aad u baahantahay:** Warqad iyo qalin.

## Waxyaabaha la qabanayo:

- Soo diyaarso qalin iyo warqad.
- Ka fakar waxaad jeceshahay inaad macallinkaaga u sheegto. Ma waxaad doonaysaa inaad u sheegto waxa aad guriga ka qabato? Waxyaabaha aad u sheegi karto waxaa ka mid ah:
  - Waxyaabaha aad jeceshahay oo aad ka heshey.
  - Arrin xiiso leh oo dhacday.
  - Shaqo adag oo aad qabatay.
  - Waxyaabo aad jeceshahay inaad sameyso.
- Ku qor warqadda meesha aad joogto, taariikhda oo saxiix warqadda.
- Haddii ay suurtogal tahay, si toos ah baad warqadda macallinka ugu gaynaysaa. Weydiiso walaalkaa kaa weyn ama qof waalid ah inuu ku caawiyo.


Dear mrs roper,
I tryed Tee wicks and i loved it. It was funny when me and my mum got tangeled up in the swing ball. I also tryed maths frame, and all the different games on it. Some of them are difficult and some of them are really fun!. I'm looking forward to making something out of wood. yours

sincerely

Theo:

**Waxqabad dheeri ah:**

- Ma qori kartaa warqad aad kaga matalayso ama ka dhigayso jawaab celin macallinkaaga kaaga timid? Isticmaal ereyada uu macallinkaagu isticmaali lahaa.
- Macallinkaaga ma u qori kartaa warqad la yaab leh (lagu qoslo adigoo u sharraxaya sababta aadan uga shaqeyn su'aalaha uu kuu diray (layliga)? Waxaad ka fakartaa waxyaabo marmarsiyo ah oo la yaab leh, tusaale ahaan:
  - "Ri' ayaa iga cuntay waraaqihii su'aalaha".
  - "Dabeyl xooggan baa dhacaysay oo buuggii iga tuurtay.
- Isticmaal tusaalahaan si uu kaaga caawiyo inaad warqadda qorto.

Macallin qaali,

Waan kaa raalligelinayaa in aanan ka shaqeyn leyligii.

Aad baan uga xumahay laakiin se .... (Wixii dhacay) ....

Waxaan sameyn doonaa ... (waxyaabaha aad sameyn doonto)..........

Mahadsanid,

Saxiixa:



**Da'da:** Da' kasta

**Caawimaad qofka weyn/walaalka weyn:** Caawimaad yar

**Waxyaabaha aad baran doonto:** Koboc luuqadeed, qoridda warqadaha, qaab dhismeedka jumladaha, higgaadda

**Waxyaabaha aad sameyn doonto:** Hal'abuurka, naxariista

**Siyaabaha kala duwan ee waxqabadka loo sameeyo:**

- DWarqadda qof kale u yeeri (U akhri si uu kuugu qoro)
- Qoraal yar samee
- Sawir ahaan ugu samee macallinkaaga waxyaabaha aad guriga ka qabato.